

# CILMIGA BULSHADA




# CILMIGA BULSHADA

Tilmaame Bare  
Fasalka 6<sup>aad</sup>

Tilmaame Bare  
Fasalka 6<sup>aad</sup>

CILMIGA BULSHADA  
Tilmaame Bare  
Fasalka 6<sup>aad</sup>



ISBN 978-99944-2-117-6



JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA  
WASAARADDA WAXBARASHADA

MOE



JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA  
WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 47.60

# **CILMIGA BULSHADA**

## **TILMAAME BARE**

### **FASALKA 6<sup>AAD</sup>**

**Qorayaasha Tafatirayaasha:**

**Cali Muxumed Bakaal  
Cabdicasiis Maxamed Aadan (Baaruud)**

**Qiimeeyayaasha:**

**Maxamed Cabdi Roble  
Maxamed Bade Maxamuud  
Deeq Axmed Badal**



**JAMHUURIYADA DIMUQRAADIGA FEDARAALKA  
ITOOBIYA, WASAARADA WAXBARASHADA**



Wasaarada waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Fedaraalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qaadista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

© 2011 wasaarad waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya. Xuquuqda buuggani way u dhawsan tahay wasarada waxbarade ee JDFI. Buugga ama qayb ka mid ah buugga lama guurin karo lama daabici karo lamana baahin karo, iyada oo la adeegsanayo qalabyada eletirooniksa iyadoo ogolaansho qoraal ah aan laga haysanin wasaaradda waxbarashada ama liisan ka saamaxaya xeerka qodobka No. 4/0/2004 ee xuquuqda daabaca oo ah maqaal ay jumhuriyada Dimoqraadiga Fedaraalka Itoobiya.

Wasaaradda waxbarashadu waxay u mahad naqaysaa shakhsiyaadka iyo kooxaha si toos ah iyo si dadban uga qayb qaatay daabicista iyo soo saaridda buuggan.

Kuwa haysta ogolaashaha qoraalka laakiin lagu eedeeyo inay gaf ka galeen xuquuqda buugga. Waa in ay la xidhiidhaan xafiis waynaha wasaaradda Waxbarashada ee ku taala Arata kiilo, Adiss Ababa, Itoobiya.

***Waxaa Soo saray oo daabacday***

STAR EDUCATIONAL BOOKS DISTRIBUTORS Pvt. Ltd.

24/4800, Bharat Ram Road, Daryaganj,

New Delhi – 110002, INDIA

**iyo**

ASTER NEGA PUBLISHING ENTERPRISE

P.O. Box 21073

ADDIS ABABA, ETHIOPIA

*Under GEQIP Contract No. ET-MoE/GEQIP/IDA/ICB/G-07/09-B.*

**ISBN** 978-99944-2-117-6

# TUSMADA BUUGA

## CUTUBKA 1<sup>AAD</sup>

### GOOBTA AY DHACAAN, DAGAAMADA IYO

#### DADKA AFRIKADA BARI..... 1

- 1.1 HALKA UU DHACO BARIGA AFRIKA .....1
- 1.2 DADYOWGA BARIGA AFRIKA.....4
- 1.3 DHAWRISTA, ILAALINTA GOOBAHA DHAXALKA AH IYO DHIBAATOYINKA LA SOO DERSA GOOBAHA DHAXALKA AH..... 6
- 1.4 DAGAAMADA IYO HAB NOLOLEEDKA BARIGA AFRIKA .....9
- 1.5 XAALADAHA SALDHIGA U AH KALA DUWANAANSHAHA DEGAAMAYNTA IYO HAB-NOLOLEEDKA..... 12

## CUTUBKA 2<sup>AAD</sup>

#### DHULKA AYNU KU NOOLAHAY ..... 16

- 2.1 OOGADA SARE EE DHULKA ..... 16
- 2.2 QAABABKA DHULKA BERRIGA AH EE UGU WAAWAYN BARIGA AFRIKA..... 27
- 2.3 KHEYRAADKA BIYAHA EE BARIGA AFRIKA.....32
- 2.4 BIYAHA BARIGA AFRIKA IYO KA FAAIIDAYSIGOODA DHAQAALE..... 36
- 2.5 GIBILKA HAWADA..... 39
- 2.6 CALAAMADAHA IYO ASTAAMAHA CAALAMIGA AH..... 43

.....

## **C U T U B K A 3<sup>A A D</sup>**

.....

### **DEEGAANKA ..... 52**

- 3.1** BAADKA(DHIRTA) DABIICIGA AH IYO XAYAWAANKA  
DUUR – JOOGTA BARIGA AFRIKA..... 52
- 3.2** SAAMAYNTA UU AADAMIGU KU LEEYAHAY  
DEEGAANKA.....56
- 3.3** HABABKA DARYEELKA CARRADA IYO BIYAHA..... 61
- 3.4** DHUL-SEEREYAASHA QARAN IYO AHMIYADA AY  
U LEEYIHIIN ITOOBIYA IYO BARIGA AFRIKA.....64

.....

## **C U T U B K A 4<sup>A A D</sup>**

.....

### **ARIMAHA DADWAYNAHA..... 69**

- 4.1** ARRIMAHA DADWAYNAHA..... 71
  - 4.2** XUQUUQAHA CARUURTA IYO ISTIRAATIJIYADAHA  
BADBAADADOODA ..... 78
  - 4.3** ARRIMAHA ISKAASHIGA ..... 80
- Muqaraka fasalka 6<sup>aad</sup> ee Cilmiga Bulshada..... 85

# Goobta ay Dhacaan Dagaamada iyo Dadka Afrikada Bari

## Hordhaca

### Natiijooyinka wax dhigista

### Tusmooyinka muhiimka ah

- 1.1 Halka uu dhaco Bariga Afrika
- 1.2 Dadyawga Bariga Afrika
- 1.3 Dhawrista, Ilaalinta goobaha dhaxalka ah iyo dhibaatooyinka la soo dersa Goobaha dhaxalka ah
- 1.4 Degitaanka iyo Hab-nololeed ka Bariga Afrika
- 1.5 Xaaladaha sal dhiga u ah kala duwanaanshaha degitaanada iyo Hab-nololeedka

## 1.1 Halka uu Dhaco Bariga Afrika

### 1. Ujeeddada Gaarka ah

*Marka uu dhamaado casharku kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:*

- *Ogaadaan halka uu daris ahaan dhaco Bariga Afrika*
- *Taxaan dalalka ka tirsan Bariga Afrika*

## 2. Tusmooyinka

- 1.1 Halka uu dhaco Bariga Afrika
- 1.2 Dadyawga Bariga Afrika
- 1.3 Dhawrista Ilaalinta Goobaha dhaxalka ah iyo dhibaatooyinka la soo dersa goobaha dhaxalka ah.
- 1.4 Degaamada iyo Hab nololeedka Bariga-Afrika
- 1.5 Xaaladaha saldhiga u ah kala duwanaanshaha degitaanka iyo hab nololeedka

### **3. Araar**

Halka ay meeli dhacdo waa meesha ay ku taallo meeli. Waxaana lagu qeexi karaa laba hab, oo kala ah:-

- xariiq ahaan iyada oo la adeegsanayo dhigaha iyo loolasha.
- Deris ahaan iyada oo la adeegsanayo dulaha biyaha leh ee ku xeeran ee deriska la ah iyo berriga ku xeeran ama deriska la ah. Bariga Afrika waa gobolka ugu xiga dhinaca Bari ee qaarada Afrika.

### **4. Hababka baris-Barasho**

#### **4.1 Kaabayaasha Dhigista**

- Isku dey sawirada lamadagaanka Nuubiya
- Sawirka Ahraamtii kushiit
- Sawirka Taalada Aksum
- khariirada Afrika

#### **4.2 Hababka wax dhigista**

- Isla falanqayn
- Kedis
- Ku muujinta maqal iyo muuqaal

#### **4.3 Cashar-diyaarinta ka hor**

Waa inaad heshaa agabka soo socda oo ay diyaar kuu ahaadaan.

- Khariirada gidaarka la sudho
- Galoobka ama koonka
- Sawirka Taalada Aksum
- Khariidad ku tusaysa halkii ay ku yaaleen Aksum iyo Nuubiya

## **4.4 Soo Bandhiga cashirka**

### **B Hordhaca Casharka**

Ku bilow cashirka su aalo aad ardayda ka waydiiso halka uu Bariga Afrika dhaco khariirada Afrika korkeeda.

Weydii in ay tilmaamaan

Xariiq ahaan iyo deris ahaan halka uu Bariga Afrika kaga yaallo iyo inay sharaxaan taariikhada guud ee waddamada geeska Afrika

### **T. Nuxurka Casharka**

Bartilmaameedka xudunta u ah qodobada deris ahaan halka ay dhacaan, u calaamadi qodobada ardayda oo kooxo ah.

### **J. Gunaanadka**

Hoosta ka xariiq qodobadan soo socda.

- Macnaha bulshonimada
- Hababka qeexida halka ay meeli dhacdo

## **4.5 Qiimaynta iyo la socadka**

### **B. Qiimaynta**

Hubi inay ardaydu fahmeen casharka iyo in kale adiga oo weydiinayana su'aalahan:-

- Sharax kala duwanaanshaha ka dhexeeya halka ay dhacaan deris ahaan iyo xariiqo (dhig iyo lool) ahaan goobuhu?

### **T. La socodka**

U dir ardayda inay soo sawiraan khariirada Bariga Afrika, tilmaamaana waddamada Bariga Afrika.

## 1.2 Dadyawga Bariga Afrika

Xiisadaha loo qoondeeyay: 4

### 1 Ujeeddooyinka ugu yaraan ee cashar dhigista

*Marka uu casharkani dhamaado, kadib ardaydu waxa ay awoodi doonaan inay:-*

- *Kala duwi (sooci) karaan wakhtigii iyo muuqaaladii ugu muhiimsanaa ee ilbaxnimooyinkii Nuubiya iyo Aksum.*
- *Aqoon u yeeshaan dhaxalkii taariikhiga ahaa ee ilbaximooyinkii hore ugu muhiimsanaa ee Bariga Afrika.*
- *Cadeeyaan dhibaatooyinka soo foodsaaray goobaha Dhaxalka.*
- *Sharaxaan hababka loo adeegsado meelaha qaarkood si loo ilaaliyo goobaha taariikhiga ah.*

### 2. Tusmooyinka

- Ilbaxnimooyinkii hore ee Nuubiya iyo Aksum
- Dhaxalkii taariikhiga ahaa ee Aksum

### 3. Araar

Nuubiya waxay ahaayeen dadyow degenaa gobol ku yaalla waqooyiga Bari ee Afrika waxay degenaayeen webiga Niil dooxadiisa labada dactal oo dhul qarfe ah oo u dhaxeeya Aswaan oo Masar ah iyo khartuum oo Suudaan ah. Boqortooyadii Aksum waxay ka soo shaac-baxday xeebaha Badda cas siiba dalalka maanta loo yaqaano Itoobiya iyo Eriteriya.

Qaar ka mid ah guulihii Aksum xadaaradaheedii waxa kamid ah

- Waxay bilaabeen lacagta qadaadiicda ah.
- Taalooyinka dhaadheer ee Aksum
- Isticmaalka xuruuftii Ge'iiska luuqadooduna ku qornayd.

---

---

## **4 Habka Baris Barashada**

### **4.1 Adeegsiga kaabeyaasha Barissta**

- Khariirad ku tusaysa goobihii Boqartooyooyinkii hore ee Afrika.
- Taalada dheer ee caanka ah ee Aksum sawirkeeda
- Khariidad ku tusaysa goobihii Qadiimiga ahaa ee Nuubiya.

### **4.2 Adeegsiga Hababka Barista**

- Isla falan qayn
- Kediska
- Faahfaahin

### **4.3 Cashar-diyaaarinta ka hor**

- Soo jeedinta (soo bandhiga) casharka oo loo adeegsanayo khariirado muujinaya Aksum iyo Nuubiyadii hore:
- Ku dhiiri gelinta ardayda inay ka heli karaan khariirada korkeeda halka ay Aksum kaga taallo Bariga Afrika
- Waddamada Bariga Afrika inay ardaydu is barbardhigaan

### **4.4 Soo Bandhigida casharka**

#### **B. Hordhaca casharka**

Dareenka ardayda ku kici su'aalahan kediska ah

- Wadamadee buu ka kooban yahay Geeska Afrika?
- Maxaa gobolkan loogu yeedhaa Geeska Afrika?
- Waa maxay arimaha uu gobolkani kaga duwan yahay gobolada kale ee Afrika Sida, Waqooyiga, Galbeedka, Koonfurta iyo Badhtamaha Afrika?
- Waa maxay sababta Dooxada Rifti ee Bariga Afrika ay uga heleen oo ay u xusheen Raad-raacayaasha Hadhaagii hore (daahfurayaashu)?

#### **T. Nuxurka Casharka**

- Cadaynta guulihii waawaynaa ee ilbaxnimadii Aksum

- Tilmaamida halka ay dhacdo Nuubiyadii hore Khariirada Bariga Afrika korkeeda
- Tixida muuqaalada ugu muhiimsanaa kuushitiskii (Nuubiya) hore xadaaradoodii
- Falanqaynta sidii ay ilbaxnimadii Aksum ku soo shaac baxday
- Falanqaynta arimihii noqday sababtii xadaaradii Aksum ay u horumartay.

## 4.5 Qiimaynta iyo la socodka

### B. Qiimaynta

Waydiinta su aalaha ay ka mid yihiin:-

- Tilmaan halkii ay ku taallay Nuubiyadii hore khariidada korkeeda
- Maxay ahaayeen Dhaxalkii taariikhiga ee Aksum?
- Cadee xadaaradihii qadiimiga ahaa ee deriska la ahaa islamarkaana xidhiidhka dhow uu kala dhexeeyay Aksumtii hore.

### T. La socodka

Ardayda qaar u calaamadi ama u dir inay khariirada Afrika ka tilmaamaan halka ugu saxsan ee ay Nuubiya iyo Aksum kaga yaalleen.

## 1.3 Dhawrista, Itaalinta Goobaha Dhaxalka iyo Dhibaatooyinka La soo dersa Goobaha Dhaxalka

**Tirada xiisadaha:2**

### 1. Ujeeddada Gaarka ah ee Casharka

*Marka uu cutubkani dhamaado kadib ardaydu waxay Awoodi doonaan inay:*

- *Cadeeyaan dhibaatooyinka soo food saara goobaha dhaxalka*
- *Sharaxaan hababka loo adeegsado meelaha qaarkood si loo ilaal iyo goobaha dhaxalka*

---

---

## **2. Tusmooyinka**

### **3. Araar**

Inkasta oo sidii ugu haboonayd waxbarashada Fasalkan xooga la saaray qodobadan aasaasiga ah ee soo socda. Dhaxalku waa taariikhda. Caadooyinka iyo sifooyinka wanaagsan ee waddan ama bulsho lahayd soona tixgelin jireen sannado badan qaybo muhiim ah dabecadahoodu. Dhaxalku waa muhiim maxaa yeelay, waxaa looga faaiidaystaa:

- Cadaymo taariikheedka waddan.
- Habab dakhli lagu helo
- Goobaha soo jiita dalxiisayaasha.
- Goobo cilmi baariseed iyo waxbarasho.
- Xarumaha loo dalxiis tago.

Goobaha dhaxalka ugu caansan ee dalkeenan Itoobiya waxaa ka mid ah: Aksum, Laalibeela, Goondhar, Buuraha Baali, Godka suufi cumar, Sheekh xuseen, koonso, iyo seereyaasha qaran sida:

- Awaasha
- Oomo
- Gaambeela.... i.w.m.

Dhibaatooyinka ugu caansan ee ka hor yimaada goobaha dhaxalka waxaa ka mid ah:-

- Tuugada (xatooyada)
- Waxyeelada dabiiciga ah.
- Ugaadhsiga xaaraanta ah.
- Dabka.

Sidaa darteed, habka lagu daryeeli karo goobaha dhaxalku waa in:-

- La horumariyo xuquuqaha sharciiyeed ee milkiileyaasha
- Ka qayb qaadashada Bulshada
- Wacyi gelin lagu sameeyo bulshada
- Tababarada ilaalinta ku saabsan oo bulshada loo qabto.

## **4. Hababka Baris-Barasho**

### **4.1 Kaabayaasha Cashar-dhigista**

- Sawirada kala duwan ee Dhaxalka Taariikhiga ah ee Itoobiya.
- Agabka Dhaxalka Taariikhiga ah.

### **4.2 Hababka cashar dhigsita**

- Su'aalo
- Daraasado
- Isla falanqayn
- Kedisyo
- Booqasho

### **4.3 Cashar diyaarinta ka hor**

- U habee qalabka ku haboon casharka
- U qaybi fasalka kooxo ku salaysan awoodooda, fikirkooda iyo dhaqsahooda
- U dejinta hab ama xeelad ku haboon iyo khariiradaha gidaarka la sudho ee la heli karo

### **4.4 Soo Bandhiga casharka**

#### **B. Hordhaca casharka**

Ku bilow fasalka naqtiinka casharkii hore weydii su'aalo guud oo ku saabsan dalxiiska Itoobiya, kuna dhiirigeli inay fikradahooda ka dhiibtan islana falan qeeyaan faaiidada iyo faaiido-darada goobaha taariikhiga ah.

#### **T. Nuxurka (xubnaha) casharka**

Qodobaan si taxadar leh u sii:

- Dhaxalka iyo faaiidooyinkooda.
- Sida loo daryeelo goobaha dhaxalka.
- Dhibaatooyinka ka hor iman kara.

**J. Gunaanadka**

Xooga saar qodobadan:

- Qeexida dhaxalka.
- Xannaanaynta (daryeelka) Dhaxalka
- Dhibaatooyinka Dhaxalka.
- Ahmiyada Dhaxalka

**4.5 Qiimaynta iyo La socodka****B. Qiimaynta**

Weydii inay sharaxaan ama cadeeyaan dhibaatooyinka ka hor yimaada goobaha dhaxalka.

**T. La socodka**

U dir inay taxaan ama qoraan goobaha dhaxalka taariikhiga ee dalkeenan Itoobiya.

**1.4 Degaamada iyo Hab nololeedka Bariga Afrika****1. Ujeeddada Gaarka ah ee cashirka**

*Marka uu dhamaado casharkani kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-*

- *Aqoonsadaan meelaha ay dadku ku badan yihiin iyo meelaha ay ku yar yihiin ee Bariga Afrika*
- *Sharax sababta iyo saamaynada dhaqdhaqaaqyada Bariga Afrika iyo Itoobiya.*
- *Kala gartaan qodobada sababa badnaanshaha tirada dad ee meelaha jooga sare ee Itoobiya, keenya iyo Taansaaniya.*
- *Aqoonsadaan saamaynta ay ku yeesheen koriinka dhaqsaha leh ee dadku Bariga Afrika*
- *Qoraan ama taxaan saamaynta ay magaaloobidu ku leedahay bulshada iyo Dhaqanka.*
- *Guud ahaan qaadaa dhigaan qodobada masuulka ka ah kala duwanaanshaha degaamada iyo hab nololeedkooda.*

- *Dib u jaleecaan sida ay deganaansho la'aanta siyaasadeed iyo dagaalada sokeeye u saameeyo tirada dadka.*

## **2. Tasmada**

Qodobada kala duwanaanshaha Degaamada iyo Hab-nololeedka

## **3. Araar**

Sidoo kale isbedelka jahaysnaanta tirada dadka ee dunida wakhti-xaadirani uu yahay mid ka dhashay koritaanka dhaqsaha badan ee tirada dadka badhtamihii sannadkii 2009 kii waxaa lagu qiyaasay tirada dad ee Bariga Afrika in ay ahayd 314 miliyan oo qof. Tani waxay ka dhigan tahay 30% inay ka yihiin wadarta tirada dad ee qaarada Afrika.

Waddanka ugu dadka badan Bariga Afrika waa dalkeenan Itoobiya. Dalka ugu tirada dad yarina waa dalka Siishalis. Baahsanaanta tirada dad ee gobolku waa mid aan sinnayn arimaha dabiici iyo dad- samee ayaa ah labada xaaladood ee xakameeya ama maamula baahsanaanta dadyawga Afrikada Bari.

Bariga Afrika meelaha ay dadku sida aadka ah ugu badan yihiin waxaa laga helaa meelaha jooga sare leh waxaana ugu wacan oo saameeya arimaha sida cimilada qoyan, heerkulka qabow iyo kulaale ka xor ah cudurada. Sidaa darteed degaamadu waa kuwo aad u badan meelaha jooga sare leh oo joogto ah oo ku salaysan beero isku dhaf ah, meesha kuwa dega meelaha jooga hoose leh oo ah xoolo dhaqato Reer guuraa ah. Koriinka dadka ee dhaqsaha leh markii laga eego dhinaca taban (xun) wuxuu leeyahay adeegyo bulsho oo liita, dhul kala filiqsan, deegaan waxyeelayn iyo shaqo la'aan.

## **4. Hababka baris-Barasho**

### **4.1 Kaabayaasha cashar dhigista**

- Diiwaanka tirada dadka
- Khariirada Bariga Afrika ee ku tusi meelaha ay dadku ku badan yihiin (Degan yihiin)
- Tirakooby xoogtood oo ku saabsan:  
Baahsanaanta tirada dadka  
Dagaamada dadka

## **4.2 Hababka Cashar dhigista**

- Ku muujinta muuqaal faahfaahsan
- Kedisyo
- Islafalan qayn iyo doodo.

## **4.3 Cashir diyaarinta ka hor**

- Isku duwida iyo habaynta diiwaanada tirada dadka sida ugu haboon
- Warqaddo waawayn (Jaartiyo) lagu dhejiyo meelo gaar ah.
- U kala qaybi ardayda kooxo si dareenkooda aad u hanatid ugana qayb qaataan si firfircoon isla falanqaynta.

## **4.4 Soo bandhiga casharka**

### **B. Hordhaca casharka**

- Isku xidhka casharkan iyo kii hore
- Isbar ardayda iyo casharkan cusub una soo bandhig agabyadii cashar dhigista.

### **T. Nuxurka casharka**

Shiishka saar (bartilmaanso) qodobada ugu muhiimsan ee sida kuwan soo socda, una sii faahfaahi si qoto dheer ee lagama maarmaanka ah:

- Sababta dhalisay dhaqdhaqaaqyada iyo barabaxa dadka
- Saamaynta Taban ee dhaqso u koriinka dadka
- Saamaynta Togan iyo Taban ee Magaaloobida
- Caddaymo keen hab sami uga faaiidaysiga khayraadka

### **J. Gunaanad (soo koobid)**

Hubi inay ardaydu fahamtay iyo in kale fikradaha ugu muhiimsan ee casharada muhiimka ah sida:

Saamaynta ugu waawayn ee koritaanka dhaqsaha leh ee tirada dadka

## 1.5 Xaaladaha Saldhiga u ah kala duwanaanshaha Degaamaynta iyo Hab-nololeedka

Xisadaha loo qoondeeyay: 4 xiiso

### 1. Ujeeddooyinka ugu yaraan cashar dhigista

*Marka uu casharkani dhamaado, kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-*

- *Agoonsadaan xaaladaha dhaliya kala duwanaanshaha dagaamada*
- *Fahmaan ariimaha masuulka ka ah kala duwanaanshaha Hab-nololeedka*
- *Garwaaqsadaan farqiga u dhexeeya dagaamada dhulka jooga sare leh iyo dhulka jooga goose leh, ee Itoobiya iyo bariga Afrikaba*
- *Garwaaqsadaan saamaynta ay ku leeyihiin dagaamaynta iyo hab-nololeedka cimilada iyo khayraadku.*

### 2. Tasmada

- Khayraadyada iyo cimilada
- Xasilooni darrada iyo dagaalada sokeeye

### 3. Araara

Sida la wada ogsoon yahay dadku waxay isugu soo urureen 30% ka dhulka qaybtiisa berriga ah, halka ay 70% ka mid ah dhulku ka tahay qayb-biyood. Waxaa jira baddaha waawayn dad laga helo, siiba Jasiiradaha ku dhexyaalla, halkaas oo halkii kiiloomitir laba-jibbaaranba laga helo dad aan badnayn. Haddaba xaaladaha dhaliya kala duwanaanshaha dagaamada iyo hab-nololeedka waxaa ka mid ah:-

- Cimilada iyo khayraadka
- Xasilooni-darrada iyo dagaalada sokeeye

## **4. Hababka Baris-barasho**

### **4.1 Kaabeyaasha Cashar-dhigista**

- Khariidadaha Itoobiya, Bariga Afrika iyo Afrika.
- Sawiro muujinaya dagaamo kala duwan.
- Aqoon-yahan ama qof ku xeel-dheer Dadka iyo Dagaamada.

### **4.2 Hababka Cashar-dhigista**

- Isla falanqayn
- Faah faahin
- Koox-hawleed
- Dood

### **4.3 Cashar diyaarinta ka hor**

- Diyaarso qalabka aad u baahan tahay ee ku haboon casharka.
- U kala qaybi kooxo Ardayda fasalka.
- Ku marti-qaad qof aqoon u leh dagaamada kala duwan iyo hab-nololeedkooda.

### **4.4 Soo Bandhiga casharka**

## **B. Hordhaca Casharka**

Ardayda su'aalo ka waydii ku saabsan casharkii kan ka horeeyay, kuna dhiiri geli inay fikrado ka dhiibtaan. Maarkii aad cinwaanka u qortid su'aalo cashaarka cusub ka weydii kadibna, u bilow casharka.

## **T. Nuxurka casharka**

Qodobada ugu muhiimsan hoosta uga xariiq, sida:

- Dagaamada kala duwan
- Hab-nololeedka

## **J. Gunnaanadka Casharka**

Soo gebagabee adiga oo qodobada ugu muhiimsan u soo koobaya, dabadeedna su'aalo weydiinaya.

## 4.5 Qiimaynta iyo la socodka

### B. Qiimaynta

Hubi in ay ardaydu fahmeen iyo in kale adiga oo adeegsanaya hawlgalo laylisyo iyo su'aalo afka ah ugu qor dhibcaha ay keenaan foom.

### T. La socodka

ku dabagal hawlaha aad u dirtay ardayda ee isugu jira koox-kooxda iyo keli-kelidaba. Ardayda ugu dadaalka badan sii abaalmarino, hadii ay suuro-gal tahay ama wax-u-dhigma. Kuwa liitana isku day sidii aad kor ugu soo qaadi lahayd.

## 4.5 Qiimaynta iyo Lasocodka

### B. Qiimaynta

*Weydii su'aalahan oo kale:*

- Maxay kala yihiin sababaha dhaliya koritaanka dhaqsahaha leh ee tirada dadka?
- Falanqeeya sababaha iyo saamaynada dhaqdhaqaaqyada dadka ee Bariga Afrika iyo Itoobiya?
- Tax ama qor saamaynada magaaloobidu ku leedahay bulsho iyo dhaqan Bariga Afrika iyo Itoobiyaba?

### T. Lasocodka

U dir shaqo guri oo ku saabsan sababaha saboolnimada keenta waxaadna fartaa inay soo qoraan warbixin kooban fasalkana ay usoo bandhigaan.

## Jawaabaha Layliga Guud Ee Cutubka 1

### I Ku qor Run ama Been

1. Run                      2. Run                      3. Run  
4. Run                      5. Run                      6. Run

### II Goobo geli

1. X                      2. T                      3. T                      4. X                      5. X                      6. X

### III. Isku Aadi

1. D 2. X                      3. Kh                      5. T                      6. S                      7. R

### IV. Su'aalo khariiradeed

Magaca Dalka	Magaalo Madaxda
Xarafka "B" waa	Asmara
Xarafka "T" waa	Addis Ababa
Xarafka "J" waa	Kambaala
Xarafka "X" waa	Dodooma
Xarafka "Kh" waa	Muqdisho

# CUTUBKA 2 DHULKA AYNKU NOOLAHAY

## 2.1 Oogada Sare Ee Dhulka

(4 xiiso)

### 1 Ujeeddada Cutubka

*Kadib marka uu dhamaado Cutubkani ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-*

- ❖ *Taxaan oo ay tilmaamaan halka ay dhacaan ama laga helo Qaaradaha iyo dulaha biyaha ugu waawayn dunida.*
- ❖ *Sawiraan khariidada Bariga Afrika tilmaamaanna muuqaalada ugu muhiimsan dhulka Bariga Afrika.*
- ❖ *Aqoon u yeeshaan islamarkaana sharaxaan khayraadyada biyaha Bariga Afrika.*
- ❖ *Aqoonsadaan dulaha biyaha iyo faaiidooda dhaqaale ee ay u leeyihiin Bariga Afrika*
- ❖ *Aqoon u yeeshaan lakabyada Gibilka (Atmosfeerka) inagu xeeran*
- ❖ *Tilmaamaan calaamadaha iyo Astamaha ugu muhiimsan ee khariidadaha muuqaalada kala sarayneed.*

### 2 Tusmooyinka ugu Muhiimsan

- Oogada sare ee dhulka
- Qaababka dhulka ugu muhiimsan ee Bariga Afrika
- Kheyraadyada Biyaha ee Bariga Afrika
- Biyaha iyo wixtarkooda Dhaqaale ee Bariga Afrika
- Gibilka Hawada
- Calaamadaha iyo Astamaha caanka ah ee Bariga Afrika

### **3 Araar**

Cutubkani wuxuu gundhigiisu ku saabsan yahay:- muuqaalada duleed Qaababka dhulka, kheyraadyada biyaha iyo ka faaiidaysigooda dhaqaale ee Bariga Afrika .

Ardaydu waxay u baahan yihiin inay ogaadaan dhulka Oogadiisa sare Qaaradaha iyo Dulaha biyaha leh. Qaybta ugu horaysa waa ogaanshaha dhulka, hoygeena iyo fahanka waxa dhici doona hadda, ogaanshaha meesha ay goobuhu yihiin.

Way fududahay inay garan waayaan Aadamiga dadyaw ka mid ah oo kale, waana marka aynaan inaguba xataa aqoonin meesha ay ku nool yihiin.

KhariiRaduhu waa kuwo ku taxaluqa fahamkeena bulsho, dhaqaale, soo koobida ama yaraynta juqraafiyeed ee dunidan aynu ku noolahay. Haddaba, Cutubkan bilow ilaa dhamaad, waxaad u baahan tihiin inay sharaxaada dhamaan casharada idiinka Caawiso ama idinka kaalmayso khariidada Bariga Afrika iyo Aduunkaba. Cutubkani, waxaad ku qaadan doontaan muuqaalada dhulka ee ugu muhiimsan Bariga Afrika, harooyinka waawayn ee ku kala filiqsan ama baahsan, webiyada, Fiinta ama figyada ugu sareeya, Gotaamada (meelaha Jooga hoose leh) iyo Dooxada Rifti.

Barashada juqraafigu waa mid shidaal-siisa ogaal-u- oomanaha Aadamiga. Waa maxay sababta meelaha ku yaalla dhulka dushiisu ay sida layaabka leh meeliba meesha kale uga duwan tahay? Waxaa jira shan (5) su'aalood oo kaa caawin ama kaalmayn kara isku-dubaridka macluumaadka ama xogta ku saabsan meelahaas ama goobahaas:-

- Waa maxay halka ay meeli dhacdo?
- Waa maxay dabeecadaha ay meeli leedahay?
- Sidee bay dadku ula xidhiidhaan ama is-dhexgal ula sameeyaan Deegaanka Debiiciga ah ee meel?
- Sidee bay dadka, badeecadaha, iyo Afkaartuba (fikirraduba) u dhex socdaan goobaha ama meelaha?
- Sidee bay goobuhu (meeluhu) isugu ekaadaan ama ugu kala duwanaadaan goobaha (meelaha) kale?

Shanta (5) su'aalood waxaa loo yaqaanaa shanta su'aalood ee juqaraafiyeed.

Su'aalo fureedyadani waxay sidoo kale oo ay kaa caawinayaan isku dubaridka casharadaada markii aad cutubkan ka gudbaysid waxaa sidoo kale muhiim ah inaad samaysid soo koobida cutubka iyo qiimayn ku salaysan shanta su'aalood ee juqraafiiga.

### **Hababka aad Ardayda ugu gudbinaysid “Muuqaalada Dunida” qaar ka mid ah**

- Tus ardayda inuu juqraafigu yahay Meel kasta
- U keen, sare na ugu qaad khariirada Aduunka
- Hel ama ka raadi xidhiidhka caalamiga ah midka ugu dhow hoygeenna (dhulkeena)
- Sahami meeraha aga adeegsado tiknoolajiyadda ama farsamada casriga ah.
- Cashar (wax) kasta qayb ka mid ah uga dhiga (samee) Juqraafi
- U dhig (samee) xataa cashar aan buugga ugu jirin oo dheeraad ah, oo ardaydana faaiido u leh
- Isku-xidh ardayda iyo dadyaw ka yimid waddamo iyo dhaqamo kale.
- Ka caawi (kaalme) inay ardaydu ku hamiyaan ama ku fikiraan mustaqbalkooda

## **2.1.1. Qaaradaha**

### **1 Ujeedooyinka gaarka ah ee ugu yaraan cashar – dhigista**

*Markii uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay:-*

- *Qeexaan waxa qaarad looga jeedo*
- *Taxaan ama qoraan magacyada todobada (7) qaaradood iyo baaxadooda.*
- *Tilmaamaan baaxada iyo deris ahaan halka ay dhacaan qaaradaha Aduunku*

## 2. Tasmada

- Qaarada
- Afrika
- Baaxada qaaradaha
- Deris-ahaan halkaay dhacaan qaaraduhu

## 3. Araar

Waa maxay qaaraduhu? Magaca qaarad wuxuu ka soo jeedaa erey Laatiini ah “Kontiinar” kaas oo macnihiisu yahay “Dhulka qaybtiisa la dul socdo”

Kelmada qaarad waxaan loo adeegsaday kala duwanaanshaha u dhaxeeya qaybaha waawayn ee kala duwan isala-markaana bededka dhulka qaybtiisa oogada beriga ah loogu sii kala qaybiyay.

Sidaa darteed, qaaradi “waa bedka dhulka qaybtiisa beriga ah ee wayn ee joogtada ah”. Dhamaan qaaradaha marka la isku wada geeyo waxay ka kooban yihiin in ka yar (1/3). Saddex-meelood Hal meel oo ka mid ah dhulka oogadiisa taas oo macnaheedu yahay, in ka badan (2/3) saddex-meelood Laba meel oo kamid ah dhulka oogadiisa inay qariyeen ama fadhiyaan biyo. Berigana qaaraduhu (2/3) saddex meelood laba meel waxay dhacaan ama ku yaallaan Cidhifka-dhulka Waqooyi. In ka badan 70% dhulka oogadiisa sare waxaa ku daboolan biyo. Waana sababta dhulka loogu yeedho “Meere Biyood”. Qiyaastii (1/3) saddex meelood Hal meel waa dhulka qaybtiisa ka samaysan beriga.

Dhulkaan beriga ah ee wayn waxaa loo kala qaybiyaa qaarado.

Qaaraduhu waxay leeyihiin kala duwaanaan Muuqaalada:-

- Juqraafiyeed
- Dhaqaale
- Luuqadeed
- Dhaqameed

Waxaa jira todoba qaaradood oo kala leh derejooyin xaga baaxada ama bedka iyo weliba tirada dadka Todobada qaaradood waxaa ka mid ah:- Aasiya (ta ugu wayn); Afrika (ta labaad ee ugu wayn); waqooyiga Ameerika 3<sup>aad</sup>; Koonfurta Ameerika 4<sup>aad</sup>; Anta-aartika 5<sup>aad</sup> yurub 6<sup>aad</sup> Awstaraaliya iyo Awsheeniya (ta ugu wada yar)

Siday xaqiiqadu tahay qeexitaanka qaarad waa dhulka qaybtiisa beriga ah ee joogtaada ah, laakiin Jasiiradaha ku yaalla Badwaynta Baasifiga ee loo yaqaano Awsheeniya ma'aha qaarad. Laakiin waxaynu odhan karnaa waxay yeesheen qaarad Tusaale:- mar-marka qaarkood waxaa lagu xidhiidhiyaa qaarada Awstraaliya.

Dhamaan qaaraduhu qaababka dhulka ayay ku kala duwan yihiin. Muuqaalada beriga goobtii kasta ee lagu siiyaa waxay leedahay dabeecado iyo qaab kala durugsan.

Waxaana si guud ahaaneed loogu kala saaraa iyada oo loo eegayo farqiga kala duwanaashaha. Joogga, farqiga kacsanaanta u dhexaysa meelaha ugu sareeya iyo meelaha ugu hooseeya.

Meesha dunida ugu saraysa waa buurta Efferest (8848 mitir ka saraysa Heerka badda) iyo meesha ugu hooseeya oo ah Badda maydka ah (392 mitir ka hooseya Heerka Badda). Dalkeenan Itoobiya meesha ugu joogga hoosaysa waa meel kutaal dawlada deegaanka Canfarta oo loo yaqaan Gotiinka canfarta. (Danaakilada) waxa taas lidkeedu noqonayaa figta ugu dheer oo ah buurta Ras Dajen (4620meter Heerka Badda ka sareysa).

Noocyada qaababka dhulka ugu muhimsan waa Buuralayda Taagaga, oogooyinka sare ee siman iyo Bannaanada.

Sidaa darteed, waa muhiim in ardayda loo sharaxo oo laga kaalmeeyo barashada muuqaal kasta oo guud iyo gaar qaarad kasta. Tusaale;- Qaarada Antaartika nolol kama jirta (xayawaan duur jog ah maleh kaluun maleh, noocyo baad oo muhiim ah malaha).

## **4. Hababka Baris- Barashada**

### **4.1 Adeegsiga Kaabayaasha Barsista**

Khariidada Aduunka

Koonka Galoobka, Atlas

## **4.2 Adeegsiga Hababka Barista**

- Isla falanqayn
- Hawl-kooxeed
- Daraasad
- Hawl-kooxeed
- Faah-faahin (Qoraal & Muuqal)

## **4.3 Cashar Diyaarinta - horteed**

- Isku day inaad khariidada Aduunka heshid
- Ardayda layli ahaan u siinay akhriyaan muuqaalada kala duwan ee ugu muhiimsan dhamaan qaaradaha.
- Ku dhiiri geli ardayda inay bartaan khariidada Aduunka
- Ardayda inta aad u kala qaybiso Todoba kooxood, koox walba hal qaarad ah u calaamadee kadibna waydii inay akhriyaan oo ay soo jeediyaan Muuqaalada ugu waawayn ee qaaraduhu sida ay u kala horeeyaan.

## **4.4 Soo Bandhigida Casharka**

### **B. Hordhaca Casharka**

Kadib marka aad ardayda dareenkooda kicisid oo ay is bartaan casharkooda cusub. Waad u bilaabi kartaa casharka adoo su'aalahan ka waydiinaya.

- Qaaraddee baynu ku noolahay?
- Waa maxay sababta dhulka loogu qeexo “ Meere Biyood”

### **T. Nuxurka Casharka**

- Sii ardayda qeexida qaarada
- Ardaydu waxay u baahan yihiin inay ogaadaan qaaradduhu halka ay deris ahaan dhacaan
- Ugu horaynba ha tilmaameen Badwaynta ugu dhow-cidhifka koonfureed qaaradaha oo dhan.

- Weydii qaar ardayda ka mid ah inay iyaga oo koox ah inay ku soo sameeyaan khariirada Aduunka walax ama shay fidsan (Tabeelle) dushiisa.
- Ku dhiiri geli Ardaydu inay sheegaan wax kasta oo ku saabsan qaaradaha oo ay garanayaan.
- U sharax ardayda qaarada Afrika wax ku saabsan gaar ahaan xoogga saar Bariga Afrika.

## **4.5. Qiimaynta iyo La socodka**

### **B. Qiimaynta**

- Tax dhamaan qaaradaha
- Teebaa ugu wada wayn qaaradaha?
- Teebaa ugu wada yar qaaradaha
- Weydii Ardaydu inay kala duwi karaan Bad yar/weyn ee kala soocaya ama kala saaraya qaaradaha

### **T. La Socodka**

- Bar ardayda sida logu falanqeeyo koox – koox sidii ay u sharixii lahaayeen Afrika halka ay dhacdo deris ahaan
- Ardayda waydii inay sameeyaan khariidad gacmeed oo ay ku muujiyaan Dunida
- Ku dhiiri geli Ardayda inay Aqoon iswaydaarsi sameeyaan ku saabsan qaarad kasta oo ku saabsan dunida

## **2.1.2. Dulaha Oogada Biyaha**

### **1 Ujeedooyinka gaarka ah ee ugu yaraan cashar dhigista**

*Kadib marka uu dhamaado casharkani ardaydu waxay Awoodi doonaan inay:-*

- *Aqoonsadaan noocyada biyaha*
- *Kala saari karaan dabeecadaha sabooyinka biyaha macaan & kharaar ama milixda leh*
- *Sharaxaan dulaha biyaha lehi iyo faaiidooda dhaqale*

- *Magacaabi karaan Badwaynaada, Haraha waawayn, webiyada iyo Baddaha yaryar ee dunida.*

## 2. Tasmada

- Noocyada Biyaha (Biyaha Macaan iyo biyaha milixda leh)
- Oogooyinka Biyaha leh iyo faaiidooyinkooda dhaqaale ee ay u leeyiliin Bariga Afrika

## 3. Araar

Oogada Biyaha:- Dhulka waxaa lagu qiyaasaa inay biyuhu ku daboolan yihiin 2/3 (saddexmeelood laba meel). Badwayntu waa biyaha ugu baaxada wayn dhulka. Waxaa jira Afar (4) Badwayn oo kala ah:- Badwaynta Baasifiga (ta ugu wayn) Badwaynta Atlaantiga, Badwaynta Hindiya iyo Badwaynta Aartiga (ta ugu yar). Waxaa kale oo jira noocyo kale oo ka mid ah dulaha biyaha leh sida Baddaha yaryar, Harooyinka iyo webiyad. Aad bay muhiim u tahay in ardayda laga caawiyo si cdna loogu qeexo kala duwanaanshaha ka dhexeeya noocyada kala duwan ee biyaha sida: Baddaha waawayn iyo yaryar, Gacamada waawayn iyo yaryar, i.w.m. Ardayda ka tus khariidada korkeeda adiga oo u kala saaraya Badwayno bAdyarooyin iyo Harooyinka laga helo qaaradaha Dunida.

### Afrika

- Webiga ugu dheer dunida: Niil 4125 mayl
- Harada ugu wayn: Fiktooriya 26,834 mayl<sup>2</sup>
- Baddaha yaryar: Midhitireeniyan, Badda cas

### Baddaha Waawayn ee Dunida

1. Badwaynta Baasifiga 63,985 000 mayl<sup>2</sup>
2. Badwaynta Atlaantiga 31,529 000 mayl<sup>2</sup>
3. Badwaynta Hindiya 28,357 000 mayl<sup>2</sup>
4. Badwaynta Aartika 5, 541 000 mayl<sup>2</sup>

**Webiyada Waawayn ee Dunida**

	<b>Webiga</b>	<b>Qaarada</b>	<b>Dhererka</b>
1.	Niil	Afrika	4125 Mayl
2.	Amasoon	K/Ameerika	4080 mayl
3.	Mississibi	W/Ameerika	3740 mayl
4.	Shaang	Aasiya	3722 mayl
5.	Yeniisey	Aasiya	3650 mayl

Biyaha milixda leh: Waxay ka sam aysmaan dhaqdhaqaaqyada biyaha dhulka korkiisa ee berriga ah xilliyada badan. Iskudhisyada dhadhaabaha ah ee ay daadka ka imanaya xaga berrigu soo qaadayaan oo noqda qayb ka mid ah milanka milixda ah. Ardayda xusuusi in ereyga “Milix” uuna halkan u taagnayn cusbada caadiga ah ee guryaheena taal, laakiin milixdani ka kooban tahay waxyaabo kala duwan oo kiimikooyin badan ah oo loo sii kala saaro cusbooyin. Biyaha milixda leh ama biyaha Baddu waxay leeyihiin dabeecadaha biyaha macaan o kale waxayna leeyihiin dhacdooy ka isbedel oo kala duwan oo ah sababta ay cusbooyinku ugu milmaan biyaha.

Biyaha baddu Tusaale ahaan biyaha macaan way kaga sareeyaan sababta oo ah saraynta milixdooda. Cufnaantana sidoo kale biyaha baddu way ka sareeyaan. Biyaha bada bar-fadhisadkoodu wuu ka hooseeyaa biyaha macaan taasoo hadana bar-karkoodu uu ka sareeyo. Walaxi waxay si fudud u dul sabayn kartaa biyaha badda markii loo eego biyaha macaan. Dad badani waxay karaan inay biyaha badda dul sabeeyaan laakiin aanay karayn biyaha macaan. Sababtuna waxay tahay biyaha milixda leh oo aad uga fudud biyaha macaan.

Sidaa darteed walaxi ma dul sabayn karto biyaha macaan, halka laga yaabo inay biyaha badda dul sabayso. Sabayn waxaa laga wadaa lahaanshaha ay walaxi leedahay inay ka sare marto walax kale. Tusaale ahaan. Buufinta leh Hilyam waxay heehaabi kartaa hawada sare maxaa yeelay waa khafiif (ama ugu wada fudud) marka aad walax ku qasabtid inaad biyaha hoos u gelisid kor bay uga soo boodaysaa iyada oo sabaynaysa.

## **4. Habka Baris-Barashada**

### **4.1. Adeegsiga Qalabka Kaabayaasha wax dhigista**

- Khariirada Aduunka
- Galoobka (koonka)
- Atlas

### **4.2. Adeegsiga Hababka Barista**

- Isla falanqayn
- Koox-hawleed
- Samaynta daraasad lagu ogaanayo webiyada (Niil) baddaha (midhitireeniyan) Haraha (Fiktuurya)
- Koox-hawleed
- Faahfaahin

### **4.3. Adeegsiga Hababka Barista**

- Isku dey inaad heshid khariirada Aduunka
- U dir ardayda hawlgallo (Dirraal) Akhris ah oo ku saabsan dulaha (oogooyinka) ugu muhiimsan ee biyaha
- Ardayda oo aad ku dhiiri gelisid barashada khariirada Aduunka
- U habaysid ardayda kooxo yaryar oo aad u dirtid inay koox kasta soo jeedisoo mid ka mid ah dulaha biyaha (Badwayno, Harooyin, webiyo) fasalkooda (xiisadooda)

### **4.4. Soo Bandhiga Casharka**

#### **B. Hordhaca Casharka**

Kadib markii aad ardayda dareenkooda iyo xiskoodaba aad soo jeedisid iyaga iyo casharkooda maalintana is bartaan. Waad u bilaabi kartaa casharka adiga oo su aalahan ku weydiinaya:

- Xagee baad biyaha la cabbo aad ka heshaan?
- Boqolkiiba imisaa biyo ah oogada sare ee dhulka?
- Ma biyaha macaan baad cabtiin mise kuwa milixda leh?

**T. Nuxurka casharka**

Weydii, Ardayda inay taxaan (qoraan) dulaha ugu muhiimsan ee biyaha dunida

- U qeex dulaha biyaha
- Ardaydu waxay u baahan yihiin in si cad loogu kala duwo kala duwanaanshaha ka dhexeeya sida: Badwayn, Badyar, Haro, webi, Tog, Balli i.w.m.
- Weydii Ardayda qaarada ay ku xeeran yihiin.

Badwayno /Badyaro/ iyo Harooyin (U kala qeybi todoba kooxood oo kooxdiba hal qaarad ah kana caawi sidii ay u soo jeedin lahaayeen xiisada fasalka ayagoo adeegsanaya khariidada Aduunka)

**4.5. Qiimaynta iyo la socodka****B. Qiimaynta**

- Tax noocyada kala duwan ee oogoyinka biyaha
- Qeex, Badwayn, Har, webi, Badyar, Gacan i.w.m
- Keebaa ugu wada wayn Badwayn, Badyar, Har
- Webiga dunida ugu dheer
- Isbarbardhigida iyo kala duwida Biyaha macaan iyo Biyaha milixda leh.
- Sharxida faaiidada dhaqaale ee oogoyinka biyaha.

**T. Gacan –la socodka**

- Ku guubaabi ardaydu inay koox – koox ku falanqeeyaan waxa uu ka kooban yahay dulaha biyuhu
- Ku dhiiri geli ardaydu inay aqoontooda is waydaarsadaan nooc kasta oo ka mid ah oogoyinka biyaha
- U sharax ardayda faaiidada dhaqaale ee Badwaynda, Haraha, Badyaraha, iyo webiyada iyagoo si gaara xoogga u saaraya dulaha biyaha Bariga Afrika

## 2.2. Qaababka-Dhulka ugu Muhiimsan Ee Bariga Afrika

4 xiiso

### 2.2.1. Muuqaallada Duleed ee Bariga Afrika

#### 1 Ujeedooyinka gaarka ee ugu yaraan cashar dhigista

*Markii casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay:-*

- *Inay aqoon u yeeshaan muuqaalada duleed ee ugu muhiimsan Bariga Afrika*
- *Qeexaan waxa Dooxada Rifti looga jeedo.*
- *Caddeeyaan ahmiyada Dooxada wayn ee Rifti.*
- *U kala saari karaan Bari iyo Galbeed Dooxada Rifti ee Bariga Afrika*
- *Tixi ama qori doonaan Haraha ugu waawayn ee laga dhex helo dooxda Rifti ee Bariga Afrika*
- *Magac-dhabaan Badwaynada Haraha waawayn, webiyada iyo Badyarooyinka dunida.*

#### 2. Tasmada

- Muuqaalada Duleed ee Bariga Afrika
- Dooxada wayn ee Rifti

#### 3. Araar

Mawduucan waxaa xoogga la saari doonaa muuqaalada ugu muhiimsan Bariga Afrika gaar ahaan dooxada wayn ee Rifti. Markii aynu ka hadlayno muuqaalada duleed waxaynu tixgelinta siinaynaa Joogga sare ee dhulka, qaabkooda, iyo bidhaamaha iyo sida ay biyuhu u dul soconayaan oo u kala baxa webiyada, Haraha, Buuraha, oogooyinka sare, ee siman iyo dhul-dhoshoga. Bariga Afrika, wuxuu leeyahay xoogaa kala durugsanaan iyo ku haboonaansho qaababka dhuleed oo gobolkan siinaya dabeecad isu ekaansho iyo kala duwanaanba.

Muuqaalada Duleed ee ugu muhiimsan Bariga Afrika.

Waxaa ka mid ah:-

- 1 Dooxada wayn ee Rifti.
- 2 Harooyinka iyo webiyada.
- 3 Buuralayda.
- 4 Safaanaha (Dhul-cawseedka)

Dooxada Wayn ee Rifti:- Magaca Dooxada Rifti waxaa u bixiyay dabayaaqadii qanigii 19<sup>aad</sup> sahamiye Ingiriis ahaa oo la odhan jiray John walter Gregory oo socdaal ku sameeyay qaab juqraafiyadeedka aan kala go'a lahayn ee lagu qiyaaso 6000 km (3,700 mayl) xaga dhererka. Waxay ka soo bilaabantaa Waqooyiga Suuriya kuna dhamaataa ilaa Badhmaha dalka Mosaambiik. Magaca dooxadu waa mid joogto ah oo loo adeegsado waxyaabaha qaarkood ee ka dhex socda dooxada. Inkastoo maanta loo tixgeliyo waxyaabaha jiiyoolaji ahaaneed (cilmiga barashada dhulka) ee aan qeexnayn oo markii muuqaalada la isku daro maanta loo adeegsado kala soocid inkasta oo ay xiriir la leeyihiin Rifti iyo hababka dil dilaaca (Rift and fault systems).

Maanta, eryga ama kelmada ugu badan ee aalaaba tixraac ahaanta loo adeegsadaa waa dooxada wayn ee Rifti ee Bariga Afrika,

Xuduudaha bar-leexadka dulaha kuwaas oo fidsan saddex-geeska Canfarta oo ah ku xidhaha dhinaca koonfureed ee looga sii gudbayo Bariga Afrika waana meesha uu gudaheeda ka jiro Habka kala go'a (qaybinta) ee dulaha Afrika u kala saara laba cusub oo dulo ah. Jiyoolojiistayaashu (kuwa ku takhasusay cilmiga dhulku) guud ahaan waxay u tixraacaan inay dulahani yihiin halka ay kasoo bilaabmaan waana dulaha Nuubiya iyo Soomaaliya.

Dooxada wayn ee Rifti waxay fidsan tahay 3000 mayl (4,830km) haga bilaabo Waqooyiga Suuriya ilaa badhtamaha Mosaambiik Dhinaca waqooyi una fidsan ilaa koonfurta iyadoo sii dhex maraysa Suuriya iyo Lubnaan, Dooxada webiga Joordan, Badda meydka, iyo gacanka yar ee Caqaba. Socodkeeday sii wadataa oo waxay soo martaa Badda cas dhamaadka laantan koonfureed oo ku eg Gacanka Cadmeed. Meeshaas oo ay ka sii ambaqaadayso qaybta Dhexe ee Bad Waynta xaga dambe ee sare ee Badwaynta Hindiya Qaybta ugu wayn ee Dooxadu waxay ku taal Afrika laga soo bilaabo Badda cas koonfurteeda Galbeed ugana soo gudubta Itoobiya ugana sii gudubta koonfur siina marta

Kenya, Tansaaniya iyo Malaawi, Dooxada hoose ee wabiga Sambiisi ee dalka Mosaambiik.

Bariga Afrika, Dooxadani waxay u kala qaybisaa Galbeedka Dooxada Rifti iyo Bariga Dooxada Rifti Galbeedka Rifti waxaa sidoo kale loo yaqaanaa. Albertiin. Rift, waana ta ugu geesaysa qaar ka mid ah Buuraha ugu dhaadheer Afrika ee ay ka midka yihiini:- Furuunga mituumba iyo silsilada Ruwensori:

## **4. Hababka Baris-Barashada**

### **4.1. Adeegsiga Kaabeyaasha Barista**

- Khariidada Aduunka
- Galoobka (koonka)
- Atlas

### **4.2. Soo Bandhiga Casharka**

- Falanqaynta
- Koox – howled
- Daraasad ku samaynta ogaanshaha webiyada (Niil) Badaha (Midhiitireeniyan) Harooyinka (Fiktooriya)
- Koox – hawleed
- Faah faahin

### **4.3. Cashar – Diyaarinta Ka Hor**

- Isku dey inaad heshid khariidada Aduunka.
- U dir ardayda inay soo akhriyaan Dulaha Biyaha ugu waawayn
- Ku dhiiri geli ardaydu inay bartaan khariidada Aduunka u habee ardayda kooxo yaryar koox kasta u dir inay soo jeediyaan mid ka mid ah Dulaha Biyaha (B/wayno; Harooyin, webiyo) xiisadooda fasalka.

## **4.4. Soo Bandhiga Casharka**

### **B. Hordhaca Casharka**

Kadib markii aad ardayda dareenkooda iyo xiskoodaba aad hanatid ee ay is bartaan casharkooda maanta. Waad u bilaabi kartaa adiga oo waydiinaya suaalahan:-

- Xagee baad ka heshaan biyaha aad cabtaan?
- Boqolkiiba imisaa biyo ah dhulka?
- Ma waxaad cabtiin Biyo macaan mise kuwa milixda leh?

### **T. Nuxurka (xubnaha) casharka**

- Weydii ardaydu inay taxaan oogooyinka biyaha dunida ugu waawayn.
- U qeex dulaha biyaha
- Ardaydu waxay u baahan yihiin in loo kala saaro kala duwanaanshaha u dhexeeya B/wayn, Haro, B/yaro, Webi, Tog, Balli, i.w.m
- Weydii ardayda qaarada ay ku xeeran yihiin B/waynada, B/yaraha, Haraha (U kala qaybi Todoba kooxood oo Hal kooxba sii hal qaarad. Kana caawi inay soo jeediyaan xiisada fasalkooda adeegsanayana khariidada Aduunka)

## **4. Hababka Baris – Barashada**

### **4.1. Adeegsiga Kaabayaasha Barista**

- Khariidada kala saraynta Afriika

### **4.2. Adeegsiga Hababka Barista**

- Falanqaynta
- Koox – hawleed
- Daraasad ku samaynta Buurta Kilimanjaaro, Gootaanka Canfarta
- Koox-hawleed

- Faahfaahin ( Qoraal & Muuqaalba)

### **4.3. Cashar – Diyaarinta Ka Hor**

- Isku dey inaad heshid khariidada kala sarayneed ee Afrika
- Ardayda u dir inay soo akhriyaan Dooxada Rifti
- Ku dhiiri geli ardaydu inay bartaan Khariidada Bariga Afrika

### **4.4. Soo Bandhiga Casharka**

#### **B. Hordhaca Casharka**

Kadib markaad ardayda hanatid xiskooda casharkoodana is bartaan waad u bilaabi kartaa casharka adiga oo su aalahan weydiinaya.

- Itoobiya ma qayb ka mid ah Dooxada waynee Rifti baa?
- Wax ka sheega oo ku saabsan goobtiina – Magaaladiina ama tuuladiina?

#### **T. Nuxurka Casharka**

- Ardaydu waxay u baahan yihiin inay ogaadaan muuqaalada dhulka ee Bariga Afrika (Dooxada Rift, Buuraha, webiyada, Haraha iyo Safaanaha
- Weydii Ardayda Meelaha ay marto dooxada wayn ee Rift?
- U qeex Dooxada Rifti una sharax si xog waran leh oo sidii ay ku samaysantay ah
- U habee ardayda kooxo yaryar kuna dhiiri geli inay tilmaamaan qaababka ugu muhiimsan ee Dooxada Rifti ee Bariga Afrika , Buurahan iyo dhul – cawseedka Safaanaha ee Bariga Afrika.
- Ku dhiiri geli ardayda inay sheegaan waxa ay ka og yihiin Buurta ugu wayn, Harada, Baddaha yaryar iyo webiyada Bariga Afrika.

## 4.5. Qiimaynta Iyo la socodka

### B. Qiimaynta

- Xageebay martaa Dooxada wayn ee Bariga Afrika ee Rifti?
- Magacaw labada laammood ee Dooxada Rifti?
- Tax ama qor muuqaalada dhulka ugu muhiimsan ee Bariga Afrika?
- Sharax abuuritaankii Dooxada Bariga Afrika ee Rifti?
- Tax dhamaan dalalaka laga helo ee ku jira Nidaamka ama Habka Dooxada Rifti ee Bariga Afrika.
- Tax qaar ka mid ah Haraha ugu waawayn ee Dooxada Rifti?
- Magaacaw meelaha ugu hooseeya iyo meelaha ugu sareeya Bariga Afrika?

### T. La Socodka

- Ku boorri ardaydu in ay falan qeeyaan koox – koox Dooxada wayn ee Rifti
- Ku dhiiri geli ardayda inay tilmaansadaan (aqoonsadaan) magaaloyin, Meelaha iyo Harooyinka dalkeena Itoobiya ee ku yaalla Dooxada Rifti
- Ka caawi inay Hadheeyaan khariidada korkeeda dhamaan Dooxada wayn ee Rifti ee Itoobiya

## 2.3 Khayraadyada Biyaha Ee Bariga Afrika

(2 xiiso)

### 1 Ujeedada Gaarka ah ee ugu yaraan cashar Barista

*Markii uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:*

- *Magacaabaan webiyada, Haraha iyo baddaha Bariga Afrika*
- *Isbar – bar dhigi karaan kalana duwi karaan Biyaha macaan iyo Biyaha milixda leh.*
- *Ka Jawaabi karaan harada ay wadaagaan dalalka. Kenya, Taansaaniya iyo Uganda ee Bariga Afrika?*

## 2. Tasmada

- Haraha, webiyada, iyo Badaha yar yar Bariga Afrika,
- Biyaha macaan iyo Biyaha Milixda leh

## 3. Araar

Koox dhan oo harooyin ah ayaa waxay dhacaan ama laga helaa Bariga Afrika kuwooda ugu badan waxaa laga dhex helaa Hab dooxeedka Rifti ee Bariga Afrika Taas oo ka samaymay qayb ka mid ah duleelo baaxad wayn oo taxan qolofka sare ee dhulka oo fidsan dhinaca waqooyi laga bilaabo webiga Sambiisi dooxadiisa siina mara Bariga iyo Waqooyi Bari ee Afrika iyo Badda cas ilaa dooxada webiga Joordan ee koonfur Galbeed Aasiya.

Harooyin yaryar oo ku yaal Itoobiya iyo dhowr harooyin dhaadheer oo dhuuban harooyinka Turkana iyo Nayaasa waxay dhacaan isla biyo shubkooda isla waqooyiga harada Nayaasa waxaa jira laanta Galbeed oo u qulqusha Waqooyi, waxayna si wayn ula dhereran tahay xuduudka Kongo (Kinshasa); laantani waxay isku xidhaa silsilad harooyin ah oo ay ka mid yihiin:- Tanganyika, kifu, Edward iyo Albert (Mobutu). Harada Fiktuuriya ma dhacdo Dooxada Rifti laakiin waxay u dhexeysaa laamaheeda Waa waynee galbeed.

Siddeeda (8) haro ee ugu waa wayn waxaa kamid ah:-

	<b>Harada</b>	<b>Bedka</b>
1	Fiktooriya	( 69,485 km <sup>2</sup> )
2	Tanganyika	( 32,900 km <sup>2</sup> )
3	Nayaasa	(29,600 km <sup>2</sup> )
4	Rudolf (Turkana)	(6,405 km <sup>2</sup> )
5	Albert	(5,594 km <sup>2</sup> )
6	Kifu	(2,693km <sup>2</sup> )
7	Rukwa	(2,590km <sup>2</sup> )
8	Edward	(2,150 km <sup>2</sup> )

Harooyinkan marka laga reebo harada Rukwa oo gebi ahaanteed ba ku dhex taala dalka Taansaaniya mooyee kuwa kale waa la wadaa gaa. Sida:- waqooyiga agagaarka Harada Rudolf (Turkana) ee Kenya waa gudaha Itoobiya. Harada fiktuuriya waxay ka dhaxaysaa Uganda, Tansaaniya iyo Kenya, Xuduudka caalamiga ah ee ay Uganda dhinaca Galbeed kala leedahay Jamhuuryada Dimoqraadiga koongo wuxuun dhex maraa Badhtamaha Harada Alberto, si lamid ah xuduudku meelaha uu maro (2/3) saddex meelood laba oo harada Edward waxay ku taal dhinaca J.D. koongo inta soo hadhay (1/3) Uganda ayay ku taal. Harada kifu waxay u dhaxaysaa dalalka Ruwanda iyo J.D. Koongo. Biyaha Harada Tanganyika waxaa wadaaga Taansaaniya J.D. Koongo, Burundi iyo Biyaha Harada Malawi (Nayasa) oo ay wadaagaan dala ilka Zambia, Mosambiik iyo Malawi, taniyo intii ay madaxbannanideedii qaadatay Taansaaniya waxay in badan ku andacoonaysay xuduudaheeda biyayowga maxaa wacay waxay sidoo kale degaan qaybo kamid ah agagaarka haraha.

Webiga ugu dheer waa Niil Badda cas waa badda ugu caansan baddaha yaryar ee gobolka Bariga Afrika 3% keliya Biyaha dhulku waa biyo macaan, qiyaastii 2/3 kamid ah waa kuwo fadhiyo oo laga helo Baraf guurka iyo cidhifyada oo laga helo Baraf guurka iyo cidhifyada dhulka Biyaha macaan intooda badani waxa ku jiraan dhulka hoostiisa 0.3% oo keliya ayaa laga helaa oogada sare ee dhulka.

Biyaha ku jira Gibilka (Atmosfeerka) wuxuu ka kooban yahay 0.04% Harada Fiktuuriya waa Harada labaad ee ugu waynee Biyaha macaan ee dunida.

## **4. Hababka Baris – Barashada**

### **4.1. Adeegsiga Kaabayaasha Barista**

Khariidada kala sarayneed ee Afrika

### **4.2. Adeegsiga Hababka Barista**

- Falanqaynta
- Koox – hawleed
- Daraasad Ku samaynta Webiga Niil  
Badda cas, Harada Fiktuuriya  
Koox- hawleed
- Faah – faahin

### **4.3. Cashar – Diyaarinta Ka Hor**

- Isku dey inaad heshid khariidada joog – kala sarayneed ee Afrika
- U dir ardayda inay soo akhriyaan Badaha, Webiyada iyo Haraha Bariga Afrika Ardayda ku dhiiri geli barashada khariidada Bariga Afrika

### **4.4. Soo Bandhiga Casharka**

#### **B. Hordhaca casharka**

Kadib marka aad hanatid ardayda xiskooda oo ay is bartaan casharkooda maalinta, waad u bilaabi kartaa adiga oo su'aalahan weydiinaya:

- Magacaw Haraha Itoobiya ee dooxada Rifti?
- Ma taqaaniin farqiga u dhexeeya Biyaha macaan iyo Biyaha Milixda leh?
- Magacaw ilaha Biyaha macaan iyo kuwa milixdaba?

#### **T. Nuxurka Casharka**

- Ardaydu waxay u baahan yihiin inay ogaadaan Badaha, Haraha iyo webiyada Bariga Afrika..
- Xooga saaris sidoo kale la siiyaa Biyaha macaan iyo mlixda leh (Astaamahooda, illahooda, iyo farqigooda)
- Weydii ardayda in badan oo ka mid ah harooyinka yaryar ee Itoobiya ee laga helo Dooxada Rifti
- U qeex dooxada Rifti una sharax si xog waran leh sidii ay ku samaysantay.
- U habee ardayda kooxo yar/yar kuna dhiiri geli inay tilmaamaan Astamaha iyo ilaha Biyaha macaan iyo kuwa milixdaba leh.
- U habee ardaydo inay soo jeediyaan inay harada Fiktooriya ay tahay harada labaad ee dunida ee Biyaha macaan.
- U habee ardayda kooxo yar/yar si ay ugu soo jeediyaan xiisada fasalkooda daraasadahan (webiga ugu dheer (Niil) harada ugu qotonka hoos dheer (Tanganyika) iyo istiraatiijiyada Badda ( Badda cas).

## 4.5. Qiimaynta Iyo la socodka

### B. Qiimaynta

- Tax shan Haro – Biyo macaan iyo saddex – Haro Biyo milix ah ee Bariga Afrika
- Wabigee baa dhinaca galbeed harada Tanganyika ugu qulqula?
- Keen magacyada shan webi oo ku dhamaada Badwaynta Hindiya oo ka yimaada Bariga Afrika?
- Aqoonsii Noocyada Biyaha iyo heerarka kee baa ah mid milix leh iyo keebaa ah mid macaan?

### T. La Socodka

- U dir webiga Niil (ishiisa, Jahada uu qulqulo, Afkiisa ama dhamaadkiisa)
- Ku dardar geli ardaydu sidii ay isula falanqayn lahaayeen iyagoo kooxo ah Biyaha macaan iyo Biyaha milixda leh
- Ka caawi oo u raac ardaydu inay dhadhamiyaan bad aqoonsadaana ama ka gartaan Biyaha milixda leh kuwa kale ee macaan.
- Ku dhiiri geli ardayda inay aqoonsadaan magaaloyin meelo iyo harooyinka Itoobiya ah iyo Dooxada wayn ee Rifti

## 2.4 Biyaha Bariga Afrika iyo Ka Faa'iidaysigooda Dhaqaale

2 xiisadood

### 1 Ujeedooyinka gaarka ah ee ugu yaraan Cashar dhigista

*Markii uu dhamaado casharkani kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-*

- *Fahmaan faaiidooyinka dhaqaale ee khayraadka biyaha B/Afrika*
- *Tilmaami karaan qaar kamid ah furaha tusaaleyaasha*
- *Fahmaan inay Biy uhu leeyihiin istiraatiijad muhiim ah*

### 2 Tusmada

- Faa'idada Dhaqaale ee Biyaha Bariga Afrika

### **3 Araar**

Khayraadyada Biyaha waxaa loo tixraacaa waa meelaha ay biyuhu ku jiraan ee dhulka hoostiisa iyo oogada sare. Waxaa sidoo kale laga tixraacaa keydka ama qiimaha wakhti xadirkan ee kheyraadkani ay haystaan Bulshada iyo deegaankaba Biyaha waxaa loo adeegsadaa dhaqdhaqaaqyada dhaqaalaha waxaana waajib ah in la qoondeeyo cadadka la isticmaalayo. Ilbaxnimooyinkii hore Biyuhu door wayn bay ka cayaari jireen waxay uga baahnaayeen gaadiid iyo cabitaan iyo ilaha ku xsaabsan kaluumaysiga iyo ugaadhsiga.

Wakhtiyo badan ayay Bulshadii Degitaanka ee ugu horaysay ay faaiidadiisa iyo horumarkiisa biyuhu u noqday mid aad u Muhiim ah qoysas ayaa durdurada, haraha, iyo webiyada agtooda ka bilaabay inay degaan si ay biyo ugu helaan xoolahooda iyo dalagyada ay qotaanba si tartiib ah ayay Tignoolajiyadii usoo koraysay in biyihii loo duwo ujeedooyin xaga waraabka ah iyo nolosha qoyskaba.

Khayraadka biyaha waxaa loo adeegsadaa habab kala duwan oo ay ka mid yihiin isticmaalka tooska ah, Beeraha waraabka kaluumaysiga, Dhalinta Quwada korontada waxasoosaa warshadeed, madadaalo ama dalxiiska, socdaal (safar biyood) ilaalinta Deegaanka, daawaynta iyo baabiinta wasakhda, wasakhda warshadaha oo ay biyuhu yihiin ilahooda iyo Adeega guud, Dhaqaalaha, Bulshada iyo siyaasadba oo ah dhamaantood dabeecadaha sameeya isu ekaansho iyo isbedelada in la maareeyo khayraadka Dabiiciga ah.

## **4. Hababka Baris – Barashada**

### **4.1. Adeegsiga Kaabayaasha Barista**

Khariidada joog – kala sarayneed ee Afrika

### **4.2 Adeegsiga Hababka Barista**

- Falan qaynta
- Koox – hawleed
- Daraasad ku samaynta ( waraabka wabiga Niil iyo kaluumaysiga Harada fiktuuriya)
- Koox – hawleed
- Faah – faahin

### 4.3 Cashar Diyaarinta Ka Hor

- Isku dey inaad heshid khariidada joog – kala – sarayneed ee Bariga Afrika
- U dir inay soo akhriyaan ardaydu u adeegsiga dhaqaalaha Bariga Afrika ee haraha, webiyada iyo baddaha

### 4.4. Soo Bandhiga Casharka

#### B. Hordhaca Casharka

Ardayda markaad dareenkooda iyo xiskoodaba hanatid casharkoodana ay is bartaan waad u bilaabi kartaa adiga oo weydiin ayay su aalahani:-

- Xagee bay korontada ka helaan dugsigiina iyo magaaladiinuba?
- Badanaa kaluun ma cuntaa? Xagee baa laga keenaa?
- Beeralayda gobolkiinu dalagyada ay beertaan ma wabi ayay u isticmaalan mise tog?
- Waa maxay faaiidadiisa dhaqaale ee biyaha?

#### T. Nuxurka Casharka

- Ardaydu waxay u baahan yihiin inay ogaadaan khayraadka biyaha iyo faaiidadooda dhaqaale ka sii tusaalooyin ku saabsan Badaha, Haraha iyo webiyada Bariga Afrika
- U qeex khayradka biyaha
- Khayraadka biyuhu waxaa uu muhiim u yahay isticmaalka guryaha, Beeraha, safarada, kaluumaysiga korontada iyo Deegaanka.
- Ku dhiirigeli ardayda inay Tusaaleyaal ka bixiyaan haro ama webi ku yaal Itoobiya kaas oo si balaadhan looga faaiidaysto waraabka, korontada, kalumaysiga gaadiidka
- U habee ardayda kooxo yaryar oo soo jeediya laba tusaale oo fiican oo faaiidada dhaqaale ee biyaha Bariga Afrika

1 Harada Fiktooriya

2 Webiga Niil

## 4.5. Qiimaynta iyo la socodka

### B. Qiimaynta

- Tax ama qor Ahmiyada khayraadka biyaha adiga oo adeegsanaya Haraha iyo webiyada Bariga Afrika?
- Magacaw qaar kamid ah Biyo xidheenada laga dhisay webiyada Bariga Afrika?
- Sharax Ahmiyada dhaqaale ee Haraha iyo webiyada?

### T. La Socodka

- Ku dhiiri geli inay ardaydu koox – koox iyaga oo ah ay isla falanqeeyaan faaiidada dhaqaale ee biyaha?
- Ka caawi ardayda adiga oo u raacaya si ay u aqoonsadaan har ama webi ku yaal Itoobiya oo loo adeegsado waraabka, korontada, safarada iyo kalumaysiga

## 2.5 Gibilka Hawada

### 1 Ujeedooyinka gaarka ah ee ugu yaraan cashar barista

*Marka uu casharkani dhamaado kadib waa inay ardaydu awoodi doonaan inay:-*

- *Aqoonsadaan lakabyad Gibilka*
- *Sharaxaan waxa uu ka kooban yahay lakabka ugu hooseeya ee Gibilka (Atmosfeerka)*
- *Sawiraan lakabyada kala duwan ee Gibilka (Atmosfeerka) iyo xuduudaha kala saara ee u dhexeeya lakab kasta*

### 2 Tasmada

- Lakabyada Gibilka
- Toroboisfeer iyo waxa uu ka kooban yahay

### 3 Araar

Atmosfeerku wuxuu ka koobay yahay dhowr lakab oo kala ah, wareega kulka, ama lakabka koowaad (Taroobo-isfeer) wareega lakabyada, ama lakabka labaad (Istaraato–isfeer) wareega Dhexe ama lakabka saddexaad (Meso-isfeer) wareega is jiidanaya (Ayoonada) ama lakabka Afraad (Termo-isfeer) iyo wareega balaadhan ama lakabka shannaad (Iksoo-isfeer).

Lakabka dhulka ugu dhaw waa lakabka koowaad. Inta badan daruuraha aynu ku aragno cirka waa kuwa laga helo lakabka koowaad lakabkani waa ka inagu xidha Jawiga wuxuuna fiidsan yahay ilaa 10 mayl oo sare ka ah dhulka oogadiisa sare wuxuuna ka kooban yahay gaasas, uumibax, kaarboon laba ogsaydh, mitayn Nitroos ogsaydh i.w.m. gaasaskani waxay inaga caawiyaan haynta kulka qayb kamid ah dib ayay ugu celiyaan oogada sare ee dhulka si ay diirimaad uga dhigaan oogada sare ee dhulka ama lakabka koowaad.

#### **Wareega kulka ama lakabka koowaad**

W/kulka (Taroboisfeerka) waa meesha ay dhamaan cimilo gooreedu (Jawigu) ka dhacdo waa gobol ay. Tuducyada hawadu marna kor u kacaan marna hoos u dhacaan. Cadaadiska hawaduna xaga sare ee lakabkan waa 10% oo keliya heer ka baddan (0.1 Atmosfeer ah) waxaa jira seere u dhexeeya Torobo isfeerka iyo Wareegga Lakabyada oo la yidhaahdo Torobobaws oo ah gobol khafiif ah

#### **Wareega lakabyada ama lakabka labaad iyo Lakabka Osoonka**

Waa lakabka ka sareeya lakabka koowaad waa meel qulqulka hawadu inta badan yahay mid siman lakabka qarada yar ee Osoonku waa mid ka sareeya wareega lakabyada ama Istaratoisfeer waana mid leh xoojin sare oo xaga Osoonka gaar ahaan marka ay Ogsajiintu samaysmayso. Lakabkan ugu horaynba waa ka Masuulka ka ah ee u qaabilsan Nuugida falaaraha halista ah ee loo yaqaano (ultraviolet- Radiaion) ee ka yimaada qoraxda Lakabkan oo ka samaysan maattar wax nuuga waana marka keliya ee ay Ogsajiinta soosaarto lakab Osoon ah Atmosfeerka dhexdiisa si ay u difaacdo falaaraha halista ah ee felega soo jiidhaya ee soo gaadhi lahaa oogada sare ee dhulka halkaa soo ay khasaare wayn gaadhsiiin lahaayeen marxaladaha nolosha waayahan waxaa loo tixgeliyaa arin aadamiga khusaysa oo ah iskudhisyadii lakabka Oзонka oo xoqmay uguna wacan tahay Falooro kaarboonka ay dadku isticmaalayaan

uumigiisa waxaana laga cabsi qabaan in cawaaqib xumi lasoo dersi doono noloshii dhulka dushiisa ka jirtay.

## **Lakabka saddexaad iyo lakabka Afraad.**

Waa wareega ka sareeya wareega lakabyada isagana waxaa ka sii sareeya wareega Ayoonada ama wareega is jiidashada halkaasoo laga helo Atamyo ayoonaysan (Ayoono Taban iyo Ayoono Togan) oo leh Elektaroono saafi ah oo danabaysan wareega Ayoonadu aadbay khafiif u yihiin, laakiin waa meesha ay isutagu ka dhacaan isla markaasna masuulka ka ah nuugista tamar cadceedeeka xooga badan ee qoraxda ka timaada ee dib u celisa mowjadaha ama hirarakooda waana halka ay suuragalka tahay inaynu u adeegsano isgaarsiinta meelaha fogaanta dheer ee raadyaha. Qaab-dhismeedkooda ayoono isfeerka si xoog leh waxaa u saameeya qurubyada danabaysan ee dabaylaha ah ee ka imaanaya qoraxda (Dabayl cadceedeeka) kuwaas oo uleexda xukunka ay xukumaan Heer cadceedeeka firfircoon ama firfircoonida Heer-Tamar-cadceedeeka. Hal dhinac oo cabbirka Ayoonsfeerka qaab-dhismeedka Atmosfeerku waa Elektaroonada xorta ah ee cufan, kuwaas oo astaan u ah darajada Ayoonoomida.

## **4. Hababka Baris Barashada**

### **4.1. Adeegsiga Kaabiyaasha Barista**

- Xariiqo ku tusaya lakabyada Gibilka

### **4.2. Adeegsiga Hababka Barista**

- Falanqayn (martiqaad loogu yeedho saldhiga ugu dhow ee laanta Saadaasha Hawada)  
Koox – hawleed
- Faahfaahin

### **4.3 Cashar – Diyaarinta Ka Hor**

- Isku day inaad heshid xariiqo ku tusaya lakabyada Gibilka
- U dir ardaydu inay soo akhriyaan Gibilka
- Isku habayso sharaxaadii khabiirka laanta Saadaasha Hawada

## 4.4 Soo Bandhiga Casharka

### B. Hordhaca Casharka

Kadib markii aad ardayda hanatid xiskooda casharkooda maalintana isbartid waad u bilaabi kartaa adiga oo weydiinaya su'aalahan;

- Gaaskee (Hawadee) baa ugu caansan qaybta hoose ee Gibilka?
- Ogsajiin la'aan miyaynu noolaan karnaa?

### T. Nuxurka casharka

- U qeex Gibilka
- Shiishka saar Gibilka, qaabdhismeedkiisa ama lakabyada Gibilka
- Dhilka Atmosfeerkiisu wuxuu ka kooban yahay lakabyo kala duwan oo aan ku qeexi karno iyada oo looeegayo Heerkulka hawada Atmosfeerkuna waa Afar lakab oo kala duwan oo kala ah Toroboisfeer, Istrato-isfeer, mesoisfeer, Ayoonoisfeer iyo Eksoisfeer oo meereyaasha kale aynu ka siman nahay.
- Koox – koox ardayda u habee hana soo jeediyaan lakab kasta oo Gibilka ah oo uu ku jiro Osoonku
- Si gaar ah lakabka ugu hooseeya xooga saar, ee wareega kulka ama Taroboisferrka oo ah ka dadka ugu dhaw waana meesha Jawigu ama isbedelka cimilo maalmeedku ka jiro wuxuuna fidsan yahay 7km oo cidhifyada dhulka ah ilaa 17km xaga dhulbadhaha ah markii jooga lakabkani kordho waxaa hoos u dhaca heerkulka Labada gaas ee ugu caansana waa Naytroojiin ( $N_2$ ) oo ka kooban 78% Atmosfeerka iyo Ogsajinta ( $O_2$ ) oo iyana ah 21%.

## 4.5. Qiimaynta Iyo La Socodka

### B. Qiimaynta

- Maxaa lagu saleeyay qaybqaybinta Afarta lakab ee Atmosfeerka?
- Heerkulku ma kordhaa mise hoosbuu u dhacaa jooga kalasaraynta ee goobahan

Lakabka koowaad? \_\_\_\_\_ Lakabka labaad? \_\_\_\_\_

Lakabka saddexaad? \_\_\_\_\_ lakabka Afraad? \_\_\_\_\_

- \_\_\_\_\_ iyo \_\_\_\_\_ waa labada gaas ee dhulka atmosferkiisa
- Magacaw isku jirka hawada ee wareega kulka Boqolkiiba?
- Waa maxay Ahmiyada lakabka Ozonku?

### T. La Socodka

- Far ardaydu inay koox – koox u wada falanqeeyaan waxyaalaha uu Atmosfeerku ka kooban yahay.
- Ka caawi ardaydu inay dib u nakhtiimaan oo ay tilmaamaan lakabka Osoonka iyo lakabyada.
- Ka caawi ardaydu inay sawiraan xariiq ku tusaya lakabyada (ka caawi si gaar ah lakabyada iyo seerayaasha kala saara ee u dhexeeya lakabyada)
- Wadahadal ay la yeeshaan saldhiga saadaasha hawada ee ugu dhow kana ururso sharaxaada ama deexinta ay ardaydaadu soo jeedinayaan ee suurogal ah.

## 2.6 Calaamadaha Iyo Astaamaha Caalamiga Ah

### 1 Ujeedooyika gaarka ah ee ugu yaraan cashar - barista

*Markii uu casharkani dhamaado Ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-*

- *Fahmaan ahmiyada khariidad midabaynta*
- *Aqoon u yeeshaan calaamadaha iyo Astaamaha ugu muhiimsan ee loo isticmaalo khariidadaha*
- *Adeegsadaan calaamadaha iyo Astaamaha u taagan warbixinada khariidad gacan ku samays ah*
- *Sameeyaan Furaha khariidada sahla*
- *Aqoonsadaan muuqaalada duleed iyo muqaalada dad sameega ah iyo bededka sawirada lagu qaaday kamarado iyo khariidadahaba.*

## 2. Tasmada

- Isticmaalka (waxtarka) midabada
- Calaamadaha iyo Astaamaha ugu muhiimsan

## 3. Araar

Akhriska khariidaduhu waa kuwo aasaasi u ah maadada cilmiga Bulshada la'aantoodna ayna maadadu macno yeelanayn xirfadaha aasaasiga ah ee khariidadaha korkooda Ardaydu waxay kala kulmi doonaan dhibaato xaga fahanka warbixinada kala duwan ee khariidadaha korkooda lagugu siiyay. Aqoonta iyo xirfadaha laga helo khariidadaha uma aha oo keliya muhiim Dugsiyo badan maadooyinkooda balse waaba quutul maalmeed. Inkastoo xirfadaha khariiradu cashar u dhigista caruurta ay u noqon karayso mid hufan, khariidado ama Atlasyo oo heerka fasalkooda ku haboon oo ardaydeena wax u sahla ma aha qiimahoodu oo keliya, balse. Waxaa laga yaabaa inay ku soo bandhigaan khariidadaha. Oo ay taasi ka dhigto wax kakan oo jacbur ah ilaa xad warbixinada sidaa darteed, waxaa lagama maarmaan ah in loogu dhigo sida: in looga bilaabo nidaam tartiib tartiib ah Akhriska khariidadaha bartilmaameedkuna uu noqdo oo keliya Hal muuqaal isla wakhti barayaashu waxay muran ka keenaan noocyada, khariidadaha kuwaas oo ah kuwo fudud oo habaysan. Horumarita xirfadaha Akhriska khariidadaha waxaa loo baahan yahay shaqo ku dhaqan ma aha oo keliya fasalka gudahiisa balse bannaankana loola baxo. Wax talo dhaxal gal ah noqon kara in lagu baro cutubyada kale ee ka soo hadhay si ay khariidaduhuu u taageeraan.

Khariidadaha sida daymada shimbirta (si qumaati ah) ayaa korka looga sawiray dhul yar baa waxaa lagu sawiray warqad yar dusheeda ku dhawaad wax walba waa laga arkaa khariidadaha dushooda marka laga reebo magacyada qoran, Astaamaha caanka ah:- Astaamaha, caanka ahi waa kuwa loo qorsheeyay ama loo dejiyay inay awoodaan xaddiga warbixin ee ugu badnaan lagu dhigay khariidadaha dushooda sida ugu waadaxsan ama habka ugu cad ee suuro gal ah.

Aragtiinada Afarta midab ee odhanaya Bededka khariiradaha waxaa lagu midabayn karaa Afartan (4) midab uun. Qolyaha aaminsan Aragtiinka ugu yaraan shaha- midabku waxayna ogayn oo ayna garanaynba muhimada qaybtani ka cayaarto isgaarsiinta warbixinada ay xambaarsan yihiin khariidadaha diishoodu xulashada midabada caqligalka ah iyo adeegsigoodu waxay adkayn karaan waayoaragnimada. Midabada oo si aad ah u liidata loo isticmaalo waxay xumayn kartaa khariidadaada adeegsigeedana dhib kala kulanto.

Xulashada midabada wanaagsan sida qodob kasta loo qorsheeyay ee u muuqda in la dalbanayo ama loo baahan yahay inyar in la qurxiyo gudaha kuma adkaanayso in si adag loo qeexo xeerarka dheeraynta badan. Dib u hubi khariidadaha kale waxaad ku arki doontaa ujeedooyin u eg khariidadaada isku dey go'aanso halka aad u isticmaalaysid adoo ku adkaynaya ujeedooyinka iyo halka ay khariidadu ku leedahay iinta ama ay ahayd in lagu sawiro. Tani waxaa laga yaabaa inay kaa caawiso go'aanka aad qaadatay ee sida aad ugu dabakhaysid midabka khariiradaada gaarka ah Hadii khariidadaadu ay tahay si lamid ah footo koobi ama faaksi lagu soo diray (laga yaabee in ay tahay khariidad si aynu isuhelo) kadib tan waa inaynu ka qaadano inagoo ku xisaabtamayna markii la qorshaynayay (La dejinayay) xariiqaha lagu sawiray ee ah Hal midab oo keliya waxaa ka fiican khariidaha leh meelaha la midabeeyay iyo Buluuga casaanka iyo madowgu si fiican bay muuqaalka u gudbiyaan.

Buluuga iyo cagaarku se ma gudbiyaan . Hadii meel iyo magacyada halkay dhacaan ama qaab kale oo kasta oo Buuga ardayga ah aad bay muhiim u tahay inay khariidadaada wax ugu deeqaan. Kadibna madabka aad ka qaadnayso waa inaad kan ku xisaabtanto midabada is diidan waxay noqon karaan kuwo muhiim ah inaad hubiso Buugaaga kana saarto meelaha taariikhdoodu habaysan tahay. Fikirka ama Aragtida midab waa mid aad u wayn oo farsamo ahaan hawlaha lagu qorayay soo jeedinayaan ku dabakhaadyo meelo badan oo gaar ahaaneed.

Waxaba aad raadin kartaa xoogaa xog waranto si aad u heshid meeshaad ka bilowday.

Astaamaha calaamadaha iyo sawirada yaryar ee kale ee wax metalayaba waa mowduuc Aragti Dugsi loogu fakaray xilli ahaan loo qorsheeyay si ay uga caawiso ardaydaadu sidii ay wax ugu baran lahaayeen sida in lagu fikiro oo loo gudbiyo si ka fiican adeegsiga Aragtida qayb kamid ah masakaxdaada. Astaamaha, Calaamadaha iyo masawirada kale waxaa la isugu geyn karaa in la abuurro Jaantusiyo sida ereyada looga samayn karo weedh

## **4. Hababka Baris- Barashada**

### **4.1. Adeegsiga Kaabeyaasha Barista**

- Khariiradaha gidaarka:- Khariidada Bariga Afrika iyo Itoobiya oo cabir wayn
- Warqada Joog kala sarayneed
- Atlaska Addis Ababa

### **4.2. Adeegsiga Hababka Barista**

- Falan qayn
- Koox-Hawleed
- Faahfaahin

### **4.3. Cashar Diyaarinta Ka hor**

- Soo ururi agabkaaga:- waxa aad u baahan tahay khariidado, Atlas, Galoob, warqad garaaf, warqad siman oo banaan, qalmaan, warqada adag ee jeebadaha leh iyo maarkaro iyo mastarado. Isu diyaari inaad sawirto ama aad horumariso khariidada gobolka, warqada joogga kala sarayneed, koobi (minguurin) Atlaska Addis Ababa.

## **4.4. Soo Bandhiga Casharka**

### **B. Hordhaca Casharka**

Bilowga casharada caadiga ah ee khariirada korkeeda kadib marka ay qabsoonto shaqo dhuleedka, sare ee aad Ardayda hanatid waad u bilaabi kartaa casharka adoo weydiinaya su'aalahan.

Waxa ay yihiin calaamadaha iyo Astaamaha caanka ahi?

Sawira Astaamaha masaajidada kaniisadaha iyo Dugsiyada khariidada korkeeda indinka oo ku muujinaya?

### **T. Nuxurka Casharka**

U qeex khariidada. Khariidadaha waxaa lagu muujin kanaa kuwo u taagam warbixinada kala duwan warbixintaas oo noqon karta waxyaalaha ay kamid yihiin:- waddooyinka, soojiidashada dalxiiska xeryaha waxayba u taagnaan karaan naqshadaha Cimilo gooreedka ama Jawiga ugu dambeeyay. Walxaha iyagana khariidada korkeeda waxaa matalaya oo loo adeegsanayaa Astaamo. Astaantu waa sawirka ku yaalla khariidada korkeeda oo u taagan waxaana ka mid ah tan dhabta ah ee dunida. Fahamka calaamadahani waxay u baahan yihiin in la adeegsado fure. Khariidadaha loo adeegsado furaha ama warsiddaha wuxuu sharaxaa macnaha calaamad kasta oo loo adeegsaday khariidada furayaashani caadi ahaan waxay tilmaamaan sawiro yaryar oo mid kasta loo adeegsaday calaamado khariidada dusheeda ayada oo la raacayo qoraalka macnaha mid kasta oo ka mid ah calaamadaha. Bal caruurta tusa khariidadaha aad u isticmaasheen si caadi ah casharada kale ama shaqo.

Waxaa laga yaabaa inaad shiishka saarteen Adeegsiga midabka calaamadaha iyo Astaamaha ugu muhiimsam. Waa muhiim inaad shiishka saartaan Hal shay isla wakhtigaas ka caawi ardayda inaad u tababartid inay ogaadaan cinwaanka khariidadaha, warsiddaha ama Furaha, qiyaas cabbirka khariidadaha, Jihooyinka (Bari, Galbeed, Waqooyi, iyo koonfur). Xariiqaha is jara (Dhigaha iyo loolka) Astaamo iyo calaamado.

**Cinwaanka:-** Wuxuu tilmaamaa waxa ay khariidadu ku tusayso

**Calaamadi:-** Warsiddaha ama furaha ayaa kuu sheegaya waxay u taagan tahay

**Qiyaas – Cabbirka:-** khariidad sameeyuhu wuxuu u adeegsadaa inay ka caawiso fahamka fogaamada kala duwan ee khariidada korkeeda. Hal-beegga cabbiraada khariirada korkeeda oo lamid ah fogaanta dhabta ah ee dunida:-

**Jihooyinka:-** Khariidaduhu sidoo kale waxay u baahan yihiin inay ku tusaan jihooyinka sida:- B,G, W,K. oo loogu yeero (4) jiho ee waawayn ama Asalka iyo kuwa ay ka midka yihiin:- WB,KB,WG, KG. oo loogu yeero (4) jiho ee ka farcama kuwa Asalka ah ama Farac. Badanaa Jahada waqooyi oo la soo gaabiyay ayaa khariidadaha xaga sare lagu muujiyaa “N” oo u taagan “North” oo ingiriisi ah macnaheeduna yahay “W” oo u taagan “Waqooyi” oo af soomaahi ah.

**Xariiqaha is Jara:-** Marmarka qaarkood xariiqahani waxay sameeyaan Dhigaha iyo loolka. Si loo helo magaalo waxaad raadini halka ay iska jaraan labada xariiqood (dhigaha iyo loolashu)

Weydii Ardayda inay tilmaamaam waxa loo adeegsaday midab kasta hana qoreen iyaga oo dhinaca hoos u taxaya Tusaale:

- Cagaar – Baadka; (Dhirta)
- Buluug – Biyaha;
- Maariin – Meelaha sare;
- Huruud – Dulaha Hoose;
- Caddaan – Fiiqa ugu wada sareeya.

Ka caawi Ardaydaada inay sawiraan khariirad – gacan – ku – samayska Dugsigooda, magaalo ay midabo isticmaaleen, calaamado iyo Fure ama warsidde

## 4.5. Qiimaynta Iyo la socodka

### B. Qiimaynta

- Qeexidda khariirada
- Sharax Ahmiyada ay Midabadu u leeyihiin khariidadaha dushooda
- Sawiraan khariidada-gacan-ku samays ah oo ay u adeegsadeen midabo, Calaamado iyo Fure
- Sameeyaan Fure fudud ama warsidde ay u isticmaaleen calaamado.

### T. La Socodka

U sheeg Ardaydaadu inay haystaan dhamaan qalabka wax lagu sawiro ama khariidad gacmeedka. Ardaydaadu waxay u baahnaan doonaan warqad iyo wax dhabarkiisu adag yahay oo ayku sawiri karaan (Tabelle ama xusuus qoraha) Qalin qori iyo baabiiso (Laabiis) waana habka lagu cabbiro fogaanta; habka lagu cabbiro.

(Jiheeye, Nooca Waqooyiga sheega ama tilmaama)

Maaree Marka ay Ardaydu Adeegsanayaan khariidad iyaga oo akhriyaya calaamado iyo Astaamo.

## Jawaabaha Layliga Guud Ee Cutubka 2

### Qaybta I Ka Jawaab su'aalaha

1. Qaaradaha aduunku waa 7 qaaradood oo kala ah:

- |                        |                 |
|------------------------|-----------------|
| 1. Aasiya              | 5. Anta-aartiga |
| 2. Afrika              | 6. Yurub        |
| 3. Waqooyinga Ameerika | 7. Awstaraaliya |
| 4. Koonfurta Ameerika  |                 |

2. Muuqaalada duleed waa muuqaalada dabiiciga ah eek ala duwan, waxaana ugu muhiimsan kuwan soo socda

- Buuraha
- Bannaanada

- Biyo Mareenada
  - Taagaga i.w.m
3. B. Biyaha macaan iyo Biyaha milixda leh waxa ay isaga mid yihiin:  
magaca guud ee ay wadaagaan oo ah biyo
- Labaduba waa darere
  - Faaiidada
  - Midabka i.w.m
- T. Biyaha macaan iyo Biyaha milixda leh waxay ku kala duwan yihiin
- Dhadhanka
  - Baaxada
  - Samaysanka
  - Bar fadhiisadka
  - Horkululaansha
  - Sabaynta
  - Cufnaanta i.w.m
4. Waxaa biyaha Bariga Afrika looga faaiidaystaa arimaha kala ah:
- Beeraha
  - Kaluumaysiga
  - Dhalinta Quwada korontada
  - Gaadiidka
5. Waxaa ka mid ah
1. Tendaho
  2. Muweetabeera
  3. Mobuuku
  4. Kilomberu

6. Jawaabta Ardayda
  - Waa lakabka leh daruur islamarkaana da'a.
7. Wuxuu ka kooban yahay Neefaha kala duwan sida:
  - Biyaha
  - Uumiga
  - Kaarboon laba ogsaydh
  - Misayn
  - Nitroos
  - Ogsaydh
8. Jawaabta Ardayda
9. Jawaabta Ardayda
10. Faaiidada midabadu ay leeyihiin lama soo kooni karo waxaase ugu muhiimsan sidan:
  - In lagu kala garto goobaha
  - Muujinta muuqaalada ay matalayaan i.w.m.

### **Qaybta II Ka dooro jawaabta saxda ah**

1. X      2. J      3. X      4. B      5. J      6. T

### **Qaybta III Isku-aadi**

1. Kh    2.      D      3.      T      4.      X      5.      B      6. J

### **Qaybta IV Buuxi meelaha Bannaan**

1. Haro, Berri
2. Baasifiga
3. Baddu, Biyaha macaan
4. b. Taroo-bo-Isfeer  
t. Istaraato-Isfeer  
j. Meso-Isfeer  
x. Termo-isfeer  
Kh. isko-Isfeer

# CUTUBKA 3 DEEGAANKA

## Tusmooyinka Cutubka

- 3.1.1 Baadka Dabiiciga ah iyo xayawaanka Duurjoogta ah ee Bariga Afrika
- 3.1.2 Noocyada iyo Baahsanaanta Baadka Dabiiciga ah iyo xayawaanka Duur-joogta ah
- 3.1.3 Xayawaanka sabadooda iyo la qabsigooda.
- 3.2 Xaaladaha saamaynta ku leh Baahsanaanta Baadka Dabiiciga ah iyo xayawaanka duur – joogta ah ee Bariga Afrika
- 3.3 Hababka Daryeelka carrada iyo Biyaha.
  - 3.2.1 Saamaynta Aadmiga iyo waxyeelada uu ku leeyahay Deegaanka
    - 3.3.1 Sababaha.
    - 3.3.2 Saamaynada
  - 3.4.1 Seereyaasha Qaranka iyo Ahmiyada ay u leeyihiin Dalkeenan Itoobiya iyo Bariga Afrika.

## 3.1 Baadka (Dhirta) Dabiiciga ah iyo xayawaanka duurjoogta ah ee Bariga Afrika

Tirada Xiisadaha:-2

### 1. Ujeeddooyinka gaarka ah

*Markii uu casharkani dhamaado*

*Ardaydu waxay awoodi doonaan inay:*

- *Qeexaan Dhirta Dabiiciga ah.*
- *Aqoon u yeelan doonaan Noocyada Dhirta ugu muhiimsan iyo xayawaanka Duur – joogta ah ee Bariga Afrika*

- *Falanqayn ku sameeyaan sida ay xayawaanku u la qabsadaan sabadooda.*

## 2 Tusamada

- Noocyada iyo Baahsanaanta Dhirta Dabiiciga ah iyo xayawaanka Duur Joogta
- Xayawaanka iyo sida ay ula qabsadaan sabadooda

## 3 Araar

Bariga Afrika wuxuu leeyahay cimilo iyo Joog-kala-sarayneed oo aad u kala duwan. Qaybaha ugu badan ee uu gobolku ka kooban yahay waa meelaha aadka u kacsan ee Afrika. Joogaga sare ee waawayn ee gobolka natiijada ka dhalatayna waxay noqotay Baahsanaanta qumaatiga ah ee Cimilada markii ay taasi ka dhalatay xaalado cimilo oo kala duwan ayay yeelatay taas oo kala baxsanaan laga bilaabo lama deegaanka kulaalayaasha ilaa cimilada dhulka jooga sare leh. Tani waxay Bariga Afrika usoo jiiday in loogu yeedho hodantimadeeda kheyraadyada Baadka Dabiiciga ah iyo xayawaanka Duur-joogta ah.

Wuxuu gobolkani leeyahay Baadka lama-degaanka iyo lama-degaan – u – ekaha, kaymo, Dhul – Cawseedyo iyo Baadka Albaynka (Alpine) = Baadka ka baxa buuralayda sare magacuna wuxuu ka soo jeedaa Baadka ka baxa Buuraha Alps ee ku yaalla qaarada yurub xataa dadka halkaa ku nool baa loo yaqaanaa Albayn (Alpine) Goboladaan kala duwan ee Baadku waxay abuureen ku haboonaanshaha sabo ee noocyada kala duwan ee xayawaanka Duur – joogta ah

## 4. Hababka Baris-Barashada

### 4.1. Adeegsiga Kaabayaasha Barista

- Khariidadaha Afrika iyo Bariga Afrika labadaba
- Sawir qaadayaal (kaameerado) Filimo sawiro caadi ah

### 4.2. Adeegsiga Hababka C/Dhigista

- Dood – kulul iyo su aalo
- Faah – faahin
- Falanqayn (lammaane, koox yar, Dhamaan Fasalka).

### 4.3. Cashar – diyaarinta ka hor

Samee khariidado, sawir qaadeyaal (kaameerado) Jaantusyo, Filimo oo aad diyaarsatid bilowga xiisadaada. Haddii aadan ka heli karayn midna Dugsiga dhexdiisa, waa inaad diyaarsato khariidad gacan ku samays ah oo ah ta gobalka bal isku day inaad ardayda ku tustid noocyada iyo baahsanaanta Baadka Dabiiciga ah iyo xayawaanka Duur – jooqta ah ee Bariga Afrika.

U samee wixii lagama maarmaan ah cashar diyaarinta ka hor ee ay ardaydu buugooda ka tixtraaci karayaan iyo Agabka kale ee sida fiican u habaysan ee Dhirta Dabiiciga ah iyo xayawaanka Duur – jooqta ah.

### 4.4. Soo Bandhiga Casharka

#### B. Hordhaca Casharka

Inta aadan “soo bandhigin ka hor mawduucaaga fasalka. Waa inaad sahamiisaa waxa ay ka og yihiin ardaydu ee ku saabsan Dhirta Dabiiciga ah iyo xayawaanka duur-jooqta ah iyo Noocyaadooda iyo baahsanaantooda ee Bariga Afrika.

Ardayda su’aalahaan waad waydiin kartaa

- Waa maxay duurjoogi?
- Waa maxay dhirta dabiiciga ahi?
- Waa maxay qaybaha ugu waawayn ee noocyada dhirta dabiiciga ah ee deegaankiina? Wax ku saabsan se Itoobiya iyo Bariga Afrika?
- Ma taqaanaa qaar kamid ah xayawaanka duur jooqta ah ee Bariga Afrika?

#### T. Nuxurka Cahsarka

- Dhagayso jawaabaha ardaydaada ee su’aalaha sare. Sabuurada ku qor qodobada qaarkood yihiin sax ama aanay ahayn
- U sharax xaqiiqada Dhirta dabiiciga ahi u yahay baad koraya oo laga helo deegaan oo hoos taga xaaladaha dabiici ee goobta iyo faragelin la’aanta aadamiga.

- Adiga oo adeegsanaya khariirada Dhirta Dabiiciga ah ee Bariga Afrika ka dhigardayda kuwo tilmaami ama aqoonsan kara Baadka dabiiciga kuwa ugu muhiimsan Moocyada aadka uga baxa gobolka
- Kooxo yaryar ka dhig ardayda oo aqoonsanaada jaadadka caanka ah ee xayawaanka Duur-jooqta ah kuwaas oo lagu xiriiriyo Gobolada dhirta kala duwan.

#### **4.5. Qiimaynta iyo La socodka**

##### **B. Qiimaynta**

Si aad u hubiso intay dhan tahay ujeedooyinkii laga lahaa in lagu guulaystay weydii su'aa lahan soo socda oo kale;

- Waa maxay dhirta Dabiici ah?
- Waa kuwee noocyada dhirta Bariga Afrika ugu caansa?
- Waa noocee baadka ku shareeran dhulka jooga hoose ee Bariga afrika.
- Ma magacaabi kartaa qaar ka mid ah dabeecadaha dhirta lama dagaanka.
- Magacow xayawaanka duurjooqta ee caadiga ah ee laga helo dhul-cawseedka Bariga Afrika

##### **T. La Socodka**

Ardaydaadu sahamin ha ku sameeyeen gobolka wax ku saabsan iyagoo ku shaqaynaya koox-koox qodobadan soo socda

- ✚ Dhibaataada haysata Dhirta Dalkeenan Itoobiya
- ✚ Xayawaanka Duur – jooqta ah deegaanadooda
- ✚ Noocyada ugu muhiimsan Baadka dabiiciga ah kaas oo laga helo gobolkooda.

## 3.2 Saamaynta uu aadamigu ku Leeyahay Deegaanka

Tirada Xiisadaha:-2

### 1. Ujeeddooyinka Gaarka ah

*Marka casharkani dhamaado Ardaydu waa inay Awoodaan:-*

- *Aqoonsiga Arimaha ugu waawayn ee saamaynta ku leh baahsanaanta duurjoogta*
- *Falanqeyaan sida deegaanka loo waxyeeleeyo iyo korodhka Tirada dadka oo iyana saamyn ku haysa xayawaanka Duur joogta ah*
- *Garwaaqsadaan islamarkaana ay fahamaan qiimaha Bilicda xayawaanka duurjoogta ah iyo Dhirta dabiiciga ah ee Bariga Afrika*

### 2. Araar

Baahsanaanta Dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanka duur – joogta ah ee Bariga Afrika waxaa saamyn ku leh dhawr arimood, oo kala ah una kala saari karno laba arimood oo kala ah Dabiici iyo dadsamee.

Arimaha dabiici:- waxaa ka mid ah cimilada, jooga kala sarayneed carrada iyo biyaha.

Arimaha Aadami:- waxaa ka mid ah Dhir – xaalufka, Daaqsin-xad-dhaaf ah, Ugaadhsiga sharci darrada ah, degitaamada ku sii fidaya i.w.m.

### 3. Hababka Baris - Barashada

#### 4.1. Adeegsiga Kaabayaasha Barista

- Jaantusyo
- Filimo
- Sawiro qaadis

#### 4.2. Adeegsiga Hababka Barista

- Sharaxaad (deexin)
- Faahfaahin (Ku muujinta qoraal iyo sawir)
- Falanqayn

Daraasad samayn

### **4.3. Cashar diyaarinta ka hor**

Samayso qalabka kaabayaasha oo diyaar la ahaw xiisadaada madaxeedaba. Hadii aadan xarunta Badhagoojiga ee dugsigiina ka helayn waa inaad diyaarsataa wax aad adiga uuni samaysatid oo aad ardayda wax ku tusi kartid.

Samee wixii lagama maarmaan ah ee aad casharka ka hor aad mawduucaaga tixraac uga dhigi lahayd. Ardaydaada buugaagtooda iyo waxyaabaha kale ee tixraaca noqonaya ee ku haboon

### **4.4. Soo Bandhiga Casharka**

#### **B. Hordhaca Casharka**

Markii aad bilowdid cinwaanka waa inaad sahansataa waxa ay ardaydu garanayaan ee ku saabsan cinwaanka iyo qodobada kale ee la xiriira. Waxaad waydiin kartaa su'aalahaan soo socda:-

- Waa maxay sababta ay baadku ugu kala duwanaadeen meel ilaa meel kale
- Waa maxay qodobada go'aamiya Nooca duur-jooqta laga helo meel cayiman?
- Ma sharixi kartaa sida uu Aadmigu u saameeyo kala baahsanaanta baadka dabiiciga ah iyo xayawaanka duur jooqta ah?

#### **T. Nuxurka casharka**

- Dhegayso jawaabaha ardaydaadu ka bixinayaan su'aalaha sare. Sabuurada ku qor adiga oo isku xidhaya qodobadooda saxda ah iyo kuwo aan saxda ahayn.

Kooxo – kooxo yaryar ka kala dhig. Ardayduna ha islafalanqeeyaan qaar ka mid ah Arimaha saameeya baahsanaanta xayawaanka Duur – jooqta ah koox walba u calaamadee Arimahooda la xiriira Aadami iyo dabiici midkood Arimiha saamaynta ku leh ee go'aamiya Baahsanaanta xayawaanka duur jooqta ah ee Bariga Afrika.

## 4.5. Qiimaynta iyo la socodka

### B. Qiimaynta

Hubi in lagu guulaystay ujeedooyinkii laga lahaa, weydii su'aalaha soo socda:-

Waa maxay sababta ay Noocyada Baadka iyo Jaadadka xayawaanka duurjoogtu ugu kala duwanaadeen meel ilaa meel kale?

### T. Miyaad sharixi kartaan sida ay cimiladu u saamayso Dhirta Nooceda iyo baahsanaanteeda?

Maxaa ka mid ah Arimaha saamaynta ku leh ee Aadmigu sababo siiba Nooca iyo baahsanaanta Baadka Rabbaaniga ah iyo xayawaanka Duur Joogta Bariga Afrika waa nooc ee baadka sida aadka ah uga baxa meelaha jooga sare leh ee Bariga Afrika?

Meelaha joogoodu hooseeyana maxaa ka baxa?

Maxay yihiin Habka ay ula qabsadaan dhirta ka baxda lama-degaanku?

Fara gelinta Aadmiga iyo waxyeelada uu ku Hayo Deegaankeena

## 1. Ujeedooyinka Gaarka ah

*Markii uu Cashirkani dhamaado Ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-*

- *Aqoonsadaan Arimaha ku qasba Aadamaha inay farageliyaan deegaanka.*
- *Isla falanqeeyaan saamaynada uu Aadmiga faragelintiisu ku hayso deegaanka.*

## 2. Tasmada

- Sababaha Aadmiga faragelintiisa
- Saamaynada Aadmiga faragelintiisu ku hayso Deegaanka.

### **3. Araar**

Si ay ugu qancaan baahidooda Cunno, Hoy, Agab, i.w.m. Aadmigu wuxuu isku haleeyaa Deegaankooda. Markii hawlgallada deegaan ee aynu ujeedooyinkooda sare ku soo magacawney Dadku waxay si toos ah u faragelinayaan deegaanka. Faragelintani waxay raad – reeb dhimaal – badan ku haysaa deegaankii. Markii qaarkood dhinaca fiican laga dayo, kuwo kale ayaa dhinaca xun noqonaya. Markii uu Aadmigu faragelinayo deegaanka saamaynada dhinaca xumi waxay dhaliyaan kharibaad deegaan oo ay ka mid yihiin. Tayadii uu deegaanku lahaa oo liicda, carradii oo nabaad – guurta, wasakhaw (Diqow) sabadii oo baaba’da dhir – xaaluf, daaqsin xad – dhaaf ah, lama-degaanoobid iyo isbedelo cimilo oo la xiriira biyo – yaraansho iyo kuwo kale. Markaa natiijada ka dhalanaysa saamaynadan waxay noqonayaan Abaaro iyo gaajo daran oo dhici karta. Tani waxay dadka ku qasbaysaa inay ka huleelaan ama ay ka qaxaan.

## **4. Hababka Baris - Barasho**

### **4.1. Adeegsiga kaabeyaasha Barista**

- Khariidadaha iyo Jaantusyadda ku tusinaya meelaha ay aafeeyeen fara gelinta aadamigu.
- Sawiro laqaaday, filimo, sawiro caadi ah.
- Warqad Adag oo balaadhan oo lago muujinayo sababo – saamaynta faragelinta Aadmigu ku hayo Deegaanka.

### **4.2. Adeegsiga Hababka Barista**

- Dood iyo su aalo
- Faahfaahin (Qoraal & muuqaal)
- Sharaxaad (deexin)
- Falanqayn (lammaane, koox, Fasalka oo dhan)

### **4.3. Cashar – diyaarinta ka hor**

Samee khariidado, sawiro la qaaday, jaantusyado, Filimo iyo waqradaha waawayn ee adag diyaar la naqo (la ahow) inta aadan gelin fasalka haddii aanad ka helayn Dugsiga waa inaad khariidad gacan – ku samays ah adeegsataa oo ku saabsan gobolka kana kooban meelaha faragelinta Aadmigu ay saamaysay. Ardayduna

si fiican ha u arkaan raadreebka fara gelinta Aadmigu ku hayso deegaanka Bariga Afrika.

Samee wixii daruuri ah cashar diyaarinta ka hor ee ku saabsan mawduuca si ay ardaydu ugaga tix-raacaan Buuggaagtooda iyo Agabka kale ee sida haboon looga tixraacan karo waxyaabaha sababa iyo saamaynada faragelinta Aadmigu ku hayo Deegaanka.

#### **4.4. Soo Bandhiga Casharka**

##### **B. Hordhaca casharka**

Inta aanad casharka soo bandhigin waa inaad ardayda ka sahamisaa waxa ay ka yaqaanaan faragelinta Aadmiga ee uu ku hayo deegaamada Bariga Afrika. Su aalahan soo socdana ka weydii:-

- Waa maxay faragelinta Aadmi?
- Waa maxay sababta ay Aadmigu u farageliyaan Deegaankooda?
- Waa maxay faragelinta Aadmigu ku hayo deegaankiisa Natiijada ama cawaaqibka ka dhalanayaa?

##### **T. Nuxurka Casharka**

- Dhegeyso jawaabaha ka soo yeeraya Ardaydaada ee su'aalaha sare ururi oo isla doono kuwa saxda ah adigoo sabuurada ku qoraya sax iyo qaladba.
- U sharax sida ay dadku u farageliyaan deegaanka si ay u buuxiyaan baahidoorda kadib isla falanqeeya xaga fiican iyo xunba. Shiishka saar cawaaqibka ka imanaya
- Ku tus dhamaan wixii kaabe ama Agab aad haysatid.

#### **4.5 Qiimaynta iyo La socodka**

##### **B. Qiimaynta**

Hubi ilaa xad inta ujeedooyinkii laga helaa lagu guulaystay. Weydii su'aalahan soo socda:-

- Waa maxay sababaha ay Aadamigu u farageliyaan deegaanka?

- Waa maxay raad-reebka dhinaca xun (Taban) ee ay fara gelintu ku hayso deegaanka?
- Sidee bay faragelinta Aadmigu ugu fudaydisaa carro – guurka iyo lamadegaanoobida?

#### **T. La Socodka**

Si ay u sameeyaan Ardayduna sahamin ku saabsan gobolka u samee shaqo – kooxeed qodobadan soo socda:-

- Sidee bay dadka gobolkiinu ugu hayaan faragelin deegaanka?
- Waa meelahee meelaha aad ay u saamaysay faragelinta Aadmigu degaamadiina?
- Maxay idinla tahay in haddii la qabto lagu yarayn karayo raad-reebka faragelinta Aadmiga ee deegaanka uu ku hayo gobolkiina

### **3.3 Hababka daryeelka carrada iyo Biyaha.**

**Tirada Xiisadaha:- 4 xiisadood**

#### **1. Ujeedooyinka Gaarka ah ee casharada**

*Markii uu casharkan dhamaado Ardaydu kadib waxay Awood u yeelan doonaan inay:-*

- *Aqoonsadaan xirfadaha kala duwan ee daryeelista carrada iyo biyaha.*
- *Sharaxaan sida uu u shaqeeyo mid kasta oo ka mid ah daryeelistu.*
- *Aqoon u yeeshaan seereyaasha qaramada ugu muhiimsan ee Bariga Afrika; iyo*
- *Halka ay dhacaan ama laga helo khariidada dusheeda ee seereyaasha qaranka ee dalkeenan Itoobiya.*

#### **2. Araar**

Kheyraadyada deegaanka sida:- carrada iyo Biyuhu waxay kaalin aad u wayn ka cayaaraan taageerida jiritaanka Aadmiga ee meeraha dushiisa. Kheyraadyadani waa kawa sida aadka ah ugu. Ahmiyada wayn inla noolaado,

taasoo la'aantii aanay dadku noolaanayn carradu waxay dadka ka caawisaa in ay soo saartaan cunno, biyuhuna waxay aad muhiim ugu yihiin nolosha dhirta iyo xayawaankaba. Daryeelista kheyraadyadani waxay ka dhigaysaa mid la xoojiyay ama la adkeeyay kheyraadyada carada iyo Biyaha ee Bariga Afrika waxaa ka jira saamaynada faragelineed ee loo isticmyaalayo ama looga faa'iidayanayo. Tani waxay lagama maarmaan ka dhigtay daryeelistooda Habab badan oo waxaa jira carrada iyo Biyaha loo xannaanayn karo. Kuwa ugu caansan hababka ilaalinta ama daryeelista waxaa ka mid ah:- Dhiraynta, Naxaraynta, Qodaal-marsin simeedka, Dallag-gediska, Biyo – waraabinta, Biyo Nadiifinta, yaraynta wasakhawga iyo kuwo kale.

### **3. Hababka Baris - Barashada**

#### **3.1. Adeegsiga Kaabayaasha Barista**

- Warqadaha waawayn ee Adag iyo Jaantusyo ku tusaya meelaha lagu daryeelo carrada iyo Biyaha
- Sawiro la qaaday, Filimo, Sawiro caadi ah

#### **3.2. Adeegsiga Hababka Barista**

- Doodo iyo su'aallo
- Faahfaahin (Qoraal iyo muuqaalba)
- Falanqayn (lammaane, koox, Fasalka)
- Booqashada goob

#### **3.3. Cashar – diyaarinta ka hor**

- Ka hor inta aadan gelin fasalka waa inay diyaar kuu yihiin kaabayaashii Baristu Haddii aanad ka heli Karin Dugsiga, waa inaad samaysataa khariidad gacan ku samays ah oo ah gobolka kana waramaysa meelaha ay ka jiraam daryeelistu. Ardayduna ha daawato sida loo daryeeli karo carrada iyo Biyaha.
- Waxaa lagama maarmaan ah inaad cashar – diyaarinta ka hor samaysid mawduuca ama cinwaanka ay Ardaydu ka tixraacayaan Buuggaagtooda ama Agabka kale ee ku haboon ka tixraacista daryeelka carrada iyo Biyaha.

### **3.4. Soo Bandhigida Casharka**

#### **B. Hordhaca Casharka**

Ka hor inta aadan fasalka u soo bandhigin cinwaanka waa inaad sahamisid bal ardaydu waxa ay ka og yihiin daryeelka carrada iyo Biyaha waxaad weydiin kartaa su'aalahan soo socda;-

- Waa maxay daryeelku?
- Maxaynu ugu baahannay daryeelka deegaankeena? Sheeg sababta?
- Waa maxay faraq u dhexeeya hababka daryeelista carrada iyo Biyaha?

#### **T. Nuxurka Casharka**

- Dhagayso jawaabaha ardaydaada ee su'aalaha sare sabuurada ku qor qodobada iskuna xidh kuwa saxda ah iyo kuwa aan ahayn.
- U sharax in daryeelku ama xannaanayntu tahay ka faaiidaysiga wanaagsan ee kheyraadyada taasoo aad muhiim ugu ah inay cimrigoodu dheeraadaan nololsha kheyraadyada dabiiciga ah. Daryeelka carrada iyo Biyuhuna waa kuwo ahmiyad wayn u leh degenaanshaha iyo jiritaanka Aadamiga
- Isla falanqeeya Hawlaha daryeelista kala duwan ee carrada iyo Biyaha.

### **3.5. Qiimaynta iyo La socodka**

#### **B. Qiimaynta**

Hubi si aad u ogaatid ilaa heerka ay gaarsiisan tahay ujeeddooyinkii laga lahaa. Kadibna weydii su'aalahan

- Waa maxay daryeelku?
- Waa maxay sababta aynu ugu baahannay daryeelista ama xannaanaynta deegaankeena?
- Maxaa ka mid ah Hawlaha ama Hababka in la daryeelo carrada iyo Biyaha?
- Waa maxay:-
- Dhirayntu?
- Dib-u – dhirayntu?

- Isku – dhafku (beero – Dhirayn)?
- Naxarayntu?
- Qodaal – marsin – simeed?
- Biyo – waraabka?

## T. La Socodka

Ardaydaadu sahamin ha ku soo sameeyaan gobolkooda kana dhig kooxo – hawleedyo ka soo shaqeeya qodobadan soo socda.

- Waa maxay dhibaatooyinka guud ee haysta khayraadyada carrada iyo Biyaha ee gobolkiina?
- Sidee bay dadku u daryeelaan carrada iyo Biyaha agagaarkiina ah?

## 3.4 Dhul-Seereyaasha qaranka iyo Ahmiyada ay u leeyihiin Itoobiya iyo Bariga Afrika

Tirada xiisadaha:- 2 Xiisadood

### 1. Ujeedooyinka Gaarka ah

*Markii uu casharkani dhamaado kadib Ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-*

- *Aqoon u yeeshaan seereyaasha qaramada Itoobiya iyo Bariga Afrika*
- *Sharaxaan ujeedooyinka iyo Ahmiyada ay leeyihiin seereyaasha qaranka*
- *Goobaha ay dhacaan ka heli karaan khariidada dusheeda ee seerayaasha qaranka Itoobiya fallanqeeyaan isbedelada iyo guulaha seereyaasha qaranka ee gobolka*

### 2. Tasmada

### 3. Araar

Mid kamid ah hababka daryeelka ama xannanaynta khayraadka Duur joogta u aasaasida seereyaasha qaranka, Beerta lagu xannaaneeyo duurjoogta, iyo si gaar ah loogu hayo noocyo badan oo xayawaanka duurjoogta ah ka mid ah cilmi baadhis ahaan i.w.m seeraha qaranku waa meel badad ga'an oo sigaara loo

xayndaabay oo ay dawladn ku ilaaliso xayawaanka duur-joogta ah iyo deegaankaba. Waxaa dalkeenan Itoobiya ka jira oo Laga aasaasay seereyaal badan iyo Bariga Afrika kuwaas oo lagu daryeelo deegaanka dabiiciga. Dhirta iyo xayawaanka duurjoogta ah. Seerayaashu waxay aad muhiim ugu yihiin dhinacyada kala ah:- Dalxiiska, Daryeelka, cilmi baadhista iyo waxbarashada. Waxay sidoo kale badbaadiyaan sabada xayawaanka duurjoogta ah Markii ay ilaaliyeen seereyaashii qaranka waxay ka dhigan tahay sabadii xayawaanka duur joogta ah oo nabad gashay.

## **4. Hababka Baris Bararsada**

### **4.1 Adeegsiga kaabayaasha Barista**

- Warqadaha adag ee la isku dhejiyo ama la isku rakibo iyo Jaantusyoy
- Sawiro laqaaday, Filimo, Sawirada caadiga ah
- Khariidado ku tusinaya halka ay dhacaan seereyaasha qaranka ee Itoobiya iyo Bariga Afrika

### **4.2 Adeegsiga Hababka Barista**

- Doodo iyo su'aalo
- Faah-faahin (Qoraal iyo muuqaal)
- Sharaxaad (Deexin)
- Falanqayn (lammaane, koox, fasalka)
- Booqasho goob.

### **4.3 Cashar-diyarint ka hor**

- Samayso kaabayaasha barista ka hor inta aadan gelin fasalka. Hadii aadan dugsiga ka heli Karin waa inaad diyaarsatid khariidad gacan ku samays ah oo gobolka ah taasoo ay ka mid yihiin seereyaasha qaranka ee Itoobiya iyo Bariga Afrika si ay ardaydu qodobkaas u fahmaan aragti ahaan ku tus.
- Cashir diyarinta ka hor samayso wax ala wixii lagama maarmaan ah ee cinwaanka casharkan Ardayda buugtooda tixraac u noqon karaya iyo Agab seerayaasha Qaranka Itoobiya iyo Bariga Afrika laga heli karo.

## 4.4 Soo Bandhiga Casharka

### B. Hordha Casharka

Inta aadan cinwaanka casharka fasalka u soo Bandhigin waa inaad ardayda ka raadisaa bal inay wax ka yaqaanaan daryaeelka Duur-joogta. Waxaad weydiin kartaa su'aalahan soo socda.

- ❏ Waa maxay daryeelku?
- ❏ Waa maxay sababta aynu ugu baahanay inaynu daryeelno Duur-joogta?
- ❏ Waa maxay sababta seere Qaran loo aasaasay?
- ❏ Maxaa ka mid ah seereyasha dalkeenan Itoobiya iyo Bariga Afrika?
- ❏ Meelaha idiin dhow ma ka jiraan wax seere Qaran ah? Maxaa loogu yeedhaa? Sheeg wakhtigii iyo sababta loo aasaasay?

### T. Nuxurka Casharka

- Si fiican u dhagayso jawaabaha ka soo yeedhaya ardayda adiga oo sabuurada ku qoraya iskuna xidhaya haddii ay qodobadu sax yihiin ama aanay ahaynba.
- U sharax in daryeelku yahay habsami u adeegsiga khayraadka iyo inay taasi aad muhiin ugu tahay si ay u cimri dheeraadaan mudada nololeed ee kheyraadka Duur-joogtu. Ardayda si xog-waran leh ugu sheeg sababta ay u daryeelayno xayawaanka Duurjoogta ah
- U sharax waxa uu yahay seere Qaran ee ugu waawayn Itoobiya & Bariga Afrika.
- Sii qaar ka mid ah fikradaha caanka ah ee ay iska leeyihiin kheyraadka xayawaanka duur-joogta ah iyo qaar ka mid ah seereyaasha qaranka dalkeenan Itoobiya iyo wadamada kale ee Bariga Afirka.

## 4.5 Qiimaynta iyo la socodka

### B. Qiimaynta

Hubi ilaa heerka lagu guulaystay ujeedadii laga lahaa casharkan Adiga oo weydiinaya su'aalahan soo socda:-

- ✚ Waa maxay seere Qaran?
- ✚ Waa maxay sababta loo sameeyay seere Qaran?
- ✚ Maxay kala yihiin qaar ka mid ah seerayaasha Qaranka ee laga helo Itoobiya iyo dalalka kale ee Bariga Afrika?
- ✚ Maxay kala yihiin qaar ka mid ah xayawaanka Duur-joogta ah ee laga helo seerayaashan soo socda ee dalkeenan Itoobiya?
- ✚ Seeraha Qaranka ee Awaash.
- ✚ Seeraha Qaranka ee yangudhi Rassaa.
- ✚ Seeraha Qaranka ee Buuraha Baali.
- ✚ Seeraha qaranka ee Buuraha simeyn.

### T. La Socodka

Si ay ardayaadu u sameeyaan sahamin wax intan ka badan oo ku saabaan isla qodobka casharkan u kala qaybi koox-koox-ay ka midyihiin waxayaalahan soo socda:-

- Baahida oo sameeyo seerayaal Qaran si loo daryeelo Duur – joogta
- Raad – reebyaday fara – gelinta Aadmigu ku hayaan seerayaasha Qaranka iyo Duur – joogtadaba.
- Dhibaatooyinka qaranka ee dalkeenan Itoobiya

**Jawaabaha Layliga Guud Ee Cutubka****I. Ka dooro**

1. T
2. X
3. J
4. X

**II. Ku qor Run ama Been**

- |         |         |
|---------|---------|
| 1. Been | 3. Been |
| 2. Been | 4. Run  |

**III. Isku Aadi**

1. J
2. X
3. B
4. T
5. Kh

# CUTUBKA

# 4

# ARRIMAHA DAD WAYNAHA

Tirada Xiisadaha: 17

## Ujeedooyinka Cutubka

Markii uu cutubkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:- falanqeeyaan muhiimada ka qayb qaadashada bulsho ee dhaqdhaqaaqyada la xiriira la dagaalanka HIV/AIDS.

- *horumariyaan aragtidooda dhanka fiican ka eegista ee dadka la nool HIV/AIDS*
- *isla gorfeeyaan isbedelada koritaanka degdega ah ee tirada dadka.*
- *aqoonsadaan xuquuqda aasaasiga ah ee caruurta.*
- *insaaleyaal ka bixiyaan ku saabsan xuquuqda caruurta, Rabshadaha xadgudubyada iyo istiraatiijiyadaha looga baxsan karo.*
- *sharaxaan dhaqamada shilalka u nugul iyo talaabooyinka badbaadada ama samatabaxa.*
- *tilmaansadaan islana falanqeeyaan urur goboleedyada Bariga Afrika.*

## Tusmooyinka ugu Muhiimsan

### 4.1. Qodobada ama Arimaha la xidhiidha dadwaynaha

4.1.1 la dagaalanka HIV/AIDS

4.1.2 Koritaanka deg-dega ah ee tirada dadka

### 4.2 Xuquuqda iyo samatabaxooda

4.2.1 Baaqii Ururka Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta

4.2.2 Xad-gudubyad xuquuqda caruurta iyo istiraatiijiyadaha Ka samatabixinta shilalka

### 4.2.3 Dhaqamada Shilalka u nugul iyo talaabooyinka ka samatabixida

#### 4.4 Arrimaha iskaashiiga

#### **Hordhaca Cutubka**

Inta ugu badan ee cutubkan Arimaha dadwayn aha ee uu ka kooban yahay, waxay ardaydu ku soo barten Fasalkii shannaad. Sidaa darteed ardaydu waxay leeyihin faham aasaasi ah oo ku saabsam qodobadan:- HIV/AIDS isbadalada degdega ah ee tirada dadka koraysa, caruurta xuquuqdooda, shilalka iyo ka samatabixidooda. Qodobka ururada iskaashiga dalalka oo keliya ayayna ardaydaadu aqoonin.

Cutubkan waxaad u adeegsanaysaa fahamkoodii hore ee ardayda sidii ay yihiin oo kale Aalad/Qalab. Islafalanqaynta qotada dheeri waxay ardayda qodabada la xiriira casharadii ay fasalka shannaadii ku Soo barten ka siinaysaa faham dheeraad ah.

Cinwaanka ugu horeeya ardaydu waxay ku baran doonaan la dagaalanka HIV/AIDS ayada oo loo marayo ka qayb qaadashada bulsho ka fogaanshaha naca iyo takoorida iyo daryeelista dadka lanool HIV/AIDS intaas waxaa u dheer koritaanka dhaqsaha ah ee dadka saamaynada iyo Raad-reebka ay ku yeesheen deegaankii dabiiciga ahaa, cunnadii, abaaro iyo gaajo xaaladaha Guryaha ayaa kamid ah casharkan

Qodabada kale ee ay ardaydu ku qaadan doonaan waxaa ka mid ah baaqa caalamiga ah ee U.Q. Midoobay ee xuquuqda caruurta. Xadgudubyada iyo shilalka iyo sidii looga samata bixi lahaa

Ugu dambayna ujeedooyinka dawlad goboleedyada Bahwadaagta ah ee Bariga Afrika.

Qodobada ugu muhiimsan ee ay ardaydu ku baran doonaan cinwaankan

Adeegsiga kaabayaasha iyo Tixraacyada.

- ✓ Sawiro
- ✓ warqaddo
- ✓ khariidado
- ✓ baaqa caalamig ah ee Xuquuqda Aadmiga
- ✓ bayaanka caalamiga ah ee Xuquuqda caruurta Arrimaha la Xidhiidha Dadka

## 4.1 Arrimaha Dadwaynaha

Tirada Xiisadaha: 6

### 1. Ujeedooyinka gaarka ah ee ugu yaraan Barista

*Markii uu Casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-*

- *sharaxaan sida ka qayb qaadashada bulshaddu uga caawiso la dagaalanka HIV/AIDS*
- *tilmaansadaan qaababka kala duwan la dagaalanka HIV/AIDS*
- *ka fogaadaan ceebayn iyo takoorida dadka la nool HIV/AIDS*
- *qaataan talaabooyinka la gudboon si ay u buuxiyaan masuuliyadooda ka saaran la dagaalanka HIV/AIDS*
- *sharaxaan raadadka koritaanka degdega ah ee dadka deegaanka iyo nolosha aadmigaba u taabanaya*
- *falanqeeyaan saamaynta dadka koriitaankiisa dhaqsaha ahi ku leeyahay bulshadooda*

### 2. Tusmooyin-hoosaad

- La dagaalanka HIV/AIDS
- Raad-reebka koritaanka dadka

### 3. Araar

Cudurka dilaaga ah ee aan weli daawada loo helin ee HIV/AIDS iyo koritaanka dhaqsaha ah ee dadka waa dhibaatooyinka ugu waawayn ee maanta haysta dalalka soo koraya Afrika ha u badnaatee.

#### HIV/AIDS

Dalalka ka hooseeya saxaaraha oo ay Itoobiya ku jirto waa meelaha uu faro baas ku hayo cudurkani gaar ahaan da'dii wax soosaarka inta u dhaxaysa 15 – 49 jirka.

Cudurkan oo si halis badan saamayn ugu yeeshay dhamaan Xaaladaha nololeed, Bulsho-dhaqaale, ee dalalka saxaaraha ka hooseeya Itoobiyanna ka mid tahay.

Haddaba la dagaalanka HIV/AIDS waa mid muwaadin kasta uu kaalintiisa ka qaato, waxaana loo baahan yahay inay ka wada qayb qaataan la dagaalanka cudurkan halista ah laga bilaabo shaqsiyaad, Bulsho, iyo dawladba.

Qof kasta oo ka tirsan bulshadu waa inuu buuxiyaa Masuuliyadaha saaran siiba tan ku aadan la dagaalanka HIV/AIDS. Masuuliyadaha waxa ka mid ah:-

- Ogaamshaha ku saabsan wadiiqooyinka laysugu gudbiyo iyo ka hortagiisaba HIV/AIDS.
- Wacyigelinta dadka kale si ay naftooda uga ilaaliyaan cudurkan halista ah.
- ka qayb qaadashada dhaqdhaqaaqyada bulshadu ay kula dagaalamayso HIV/AIDS.
- in laga dheeraado ceebayn iyo takoorida dadka qaba cudurka HIV/AIDS
- in dadka cudurkan la nool la siiyo daryeel iyo taageero

la dagaalanka cudurkani qof kasta oo bulshada ka tirsani wuxuu kaga qayb qaadan karaa urur ahaan, Bulshada Rayadka ama shacabka ah sida “idhir “ururka ka hortaga cudurka HIV/AIDS ururo noocaas oo kale lwm

### **Koriinka Dhaqsaha ah ee Tirada Dadka**

Tanina waa dhacdo kale oo ku keentay dhibaato aad u wayn dhaqdhaqaaqyadii kala duwanaa ee Bulsho-dhaqaale iyo horumarka ee dalalka ka hooseeya saxaaraha oo uu dalkeenana ka mid yahay.

Dhalashada, Dhimashada iyo Qixitaankuba waa saddex arimood oo kamid ah koritaanka dadka gobol ama waddanba

Arrimahani waxay sababeen raad-reebna kaga tageen deegaankii dabiiciga ahaa, cunnadii, guryihii iyo arimihii kale ee Bulsho sida:-

- ✓ Waxbarashadii
- ✓ Caafimaadkii

Koriinka dhaqsaha badan ee dadku waxaa kale oo ka dhalatay Cawaaqibyo daranna u geysteen deegaankii waxaa ka mid ah: Dhir-xaalufin, wasakhaw (Diqow) iyo Carradii samayd oo nabaad guurtay. dhamaan qodobadaasi waa dhibaatooyinka Deegaan oo ay sababeen koritaanka dadka iyo baahidiisa oo

iyana ka garab kordhaysa oo cadaadis ba'an ku haysa ka faaiidaysigii khayraadka dabiiciga ahaa sida kaymaha, Dhul-beereedyada, Biyihii, Hawadii I.W.M.

Waxaana dhamaantood ka dhashay arimahan soo socda:-

- cunto yaraan
- gaajo
- abaaro
- isbedelka cimilada
- lama dagaanoobid
- daaqsin-xad-dhaaf ah
- carro-guur

Dhibaatooyinkaas iyo kuwo kaleba waa arimo haysta waddamo badan oo Afrika ah. Dhibaataada Hoy ama guri la'aantuna waa mid kale oo sidoo kale ka jirta magaalooyin badan oo ka jira Afrika. Waxayna Afrika ka siman tahay la'aanta Heerka loogu talagalay guryaha dadka intiisa badani waxay ku nool yihiin guryahooda liita oo ay dadkuna ku Soo xoomeen oo aan ku filayn Xaga baaxada, Adeegyada kale sida:- suuli, koronto Biyo, IWM oo ka maqan.

## **4. Hababka Baris-Barashada**

### **4.1 Adeegsig Agabka kaabeyaasha iyo Tixraacyada**

- ✓ khariidada Afrika.
- ✓ sawirada ay ka mid yihiin dhir-xaaluf, wasakhaynta Hawada, webiyada, magaalo dhaq-dhaqaaqyada Bulsho ee Xaga HIV/AIDS I.W.M.
- ✓ Warqadaha waawayn ee ad-adag oo ay ku yaallaan muuqaalo ku tusinaya:- dhir-xaaluf, dhul-googo'cunno yaraan, Hoy la'aan I.W.M
- ✓ Kheyraadka shaqsiyaad (kuwa ka shaqeeya ladagaalamka HIV/AIDS) sawiradooda.

### **4.2 Adeegsiga Hababka Barista**

- ✓ sharaxaad
- ✓ lammaane – u – falanqayn

- ✓ koox – u – falanqayn
- ✓ Soo bandhig
- ✓ Daraasad
- ✓ Xigasho

### 4.3 Cashar diyaarinta ka hor

Dhamaan adiga oo diyaar ah oo adeegsanaya kaabayaasha iyo kuwa kale oo laga tixraaci karaba waxay kaa caawinayaan in aad si fiican ugu diyaar garowdid Soo bandhigista casharka.

### 4.4 Soo Bandhigida Casharka

#### I Ladagaalamka HIV/AIDS

#### B. Hordhaca casharka

- U sheeg ardayda waxa ay dhigan doonaan
- kadib markaad ardayda fir fircooni siisid ee aad hanati dareenkooda iyo xiskoodaba waad u bilaabi kartaa casharka adiga oo ardayda kooxo u kala qaybinaya wax-qabadna u bilaabaya ay kaga Soo shaqeeyaan buuggaagtooda. Su'aalaha ku jira ee ay ka midka yihiin sida:-
  - Cudurka HIV/AIDS ma mid aad khatar ugu ah jiritaanka dadyaw aadu badan oo Afrika oo ay Itoobiya ka mid tahay baa? sheeg sababta?
  - Waa dadka caynkee ah dadka uu aadka u, saameeyay HIV/AIDS Afrika? xataa Itoobiya? Waayo?
- T. Adiga oo adeegsanaya jawaabaha ardayda waxaad dhexgelisaa sharaxaad ku saabsan saamiga HIV/AIDS ee dunida, Afrika, inta saxaaraha ka hoosaysa iyo Itoobiya. Si fiican u fahamsii saamaynada xaaladaha Bulsho – dhaqaale ee shaqsiyaad Qoysas, Bulsho iyo dawladba
  - Waydii ardayda inay qeexi karaan ka qayb qaadashada iyo inay sharaxaan waxtarka la dagaalamka HIV/AIDS
  - U sharax sidii ay bulshadooda uga caawin lahaayeen la dagaalamka HIV/AIDS. Aqoonsii masuuliyadahooda

- Kadib fahamsii sida ay bulshada ay ka tirsan yihiin shaqo kasta oo ay wadajir ugu qabanayaan iyaga oo ururinaya ula dagaalamayaan HIV/AIDS. Tusaaleyaalna ka sii oo dhab ah. Sida ururada ka jira deegaankiina ee la dagaalama HIV/AIDS
- Ogeysii cawaaqibka ka dhalanaya hadii ceebayn iyo takoorid lagala hor yimaado dadkii la noolaa HIV/AIDS Tusaaleyaal u raaci sidii ay u taageeri lahaayeen ku saabsan.
- J. Qodabada muhiimka ah ugu habee sabuurada marka aad Soo bandhigaysid casharka si ay ardaydu buuggaagta uga fiiriyaan. Una samee koox-lammaane ah oo wax-qabadka ha kaga Soo shaqeeyaan Buuggaagtooda ay wax ku qoraan.**
- Ku dhiiri geli ardayda inay wakhti kasta inta ay Soo bandhiggida cahsarku socoto ku su'aalaan.

## 4.5 Qiimaynta iyo la socodka

### B. Qiimaynta

Su'aalo sida:

- i) Waa maxay sababta aan ugu baahanay inaan la dagaalano HIV/AIDS?
- ii) Waa maxay Masuuliyadaha kaa saaran inaad kala dagaalanto bulshadaada HIV/AIDS?
- iii) Sideebay dadka ka tirsan bulshadu ula dagaalami karaan iyagoo wadajira HIV/AIDS?

### T. La Socodka

- Uga dir buuggooda daabacan hawl ay iyaga oo u madax bannaan
- Kaga soo shaqeeyaan

### J. Soo koobida Casharka

Sii Ardayda Soo koobida fikiradii iyo Araadii casharka

- ✓ qof kasta oo bulshada kamid ahi waa imuu door axaadleh ka qaato la dagaalanka HIV/AIDS
- ✓ kaqayb-qaadashada firfircooni Astaamaha muwaadinka suuban weeyaan

- ✓ ka qayb-galka bulsho ee firfircooni wuxuu ina tusaa hawlaha ama habka ugu muhiimsan ee la dagaalanka HIV/AIDS
- ✓ ka mid noqoshada, ka qayb-qaatayaasha ururada kala duwan sida Naadiyo si wadajira ula dagaalama HIV/AIDS waa mid ka caawinaysa bulshada deegaankooda
- ✓ Xubin kasta oo bulshada ka mid ahi waa inuu ka dheeraado ceebaynta iyo takoorida dadka la nool HIV/AIDS

## **II. Koritaanka Dadka ee Degdega**

### **B. Hordhaca Casharka**

Kadib hordhaca casharka iyo firfircooni gelinta ardayda, waad u bilaabi kartaa casharka ku bilow waxqabadka buuggooda daabacan ku yaalla oo weydii su'aalaha:-

- Maxaad u malaynaysaan sababaha keena koritaanka dadka ee dhaqsaha ah ee meelaha qaarkoodna hooseeya?

U ogolow inay ardydu waxqabadkan iyagoo laba labo ah inay wadaagaan. Si ay isugu faaiideeyaan

### **T. Nuxurka Cahsarka**

Dood ardayda dhex-dhig oo ku saabsan waxa dadka oo aad u bata looga jeedo iyo sida ay dhibaataada Halista ah ugu yihiin waddamada Soo koraya ee Afrika oo ay Itoobiya ku jirto.

- U faah faahi qodobada iyo arimaha ugu waawayn ee dalalka koriinka dadku dhaqsaha yahay
- Ku dhiirigeli ardayda inay isla falanqeeyaan koriinka dadka ee dhaqsaha ah raad-reebkiisa ama saamayntiisa Deegaan, cunno, hoy abaar iyo gaajo
- Sharaxaado intan ka badan ka sii
- Ardaydu ha akhryeen Daraasada iyaga oo Koox-lammane ah isu habaynaya wax-qabadka buugga daabacan ku jira waxa loo baahanayaa inta Xiisada lagu jiro
- Ku dhiiri geli ardayda inay ka qayb qaataan wax-qabadka lammaane iyo koox ahaanba

- Ku dhiiri geli ardydu inay su'aalo ku waydiiyaan inta aad Soo bandhigaysid casharka.

## 4.5 Qiimynta iyo La socodka

### B. Qiimayn

Weydii Suaalahan

#### i) Sideebuu taranka dadka ee degadega ahi u sababaa

- Beero yaraansho
- Dhir Xaalufin
- Guryo yaraau
- Gaajo iyo Abaar

#### ii) Qeex

- Dlkhowga
- Daaqsin-Xad-dhaaf
- Lamadegaamayn
- Abaar

### T. La socodka

- Ardayda sii tilmaamo ay raacaan u dir hawl Taasoo. Ku jira buueggooda daabacan.

### J. Soo koobida casharka

Arday waliba ha xafido Fikradaha iyo Aaraada casharka ugu mudan

- Wadamo badan oo Afrika ah oo ay Itoobiya. Ku jirto ayuu ka Xawli badan yahay taranka dadku kan dhaqaalaha
- Baaxada tirada dad ee Afrika dalal badan oo ka tirsani waxay culays wayn ku haysaa Awoodii khayraadyada qaadi karayeen
- Saamiga sare ee dhalashada waa ka ugu muhiimsan ee dhalinaya koriinka degdega ah ee dalalka ugu badan Afrika.
- Dhibaataada ugu yar ee taranka degdeg uu leeyahay waa waxyeelaynta deegaanka dabiicig ah, caroguurka I.W.M.

- Taranka dadka ee degdega ahi waxay sababtaa Dhulka oo hoos uga'a iyo Beeraha oo aad loogu celceliyo Tani waa ta sababta cunto yaraanta
- Taranka dadka ee degdega ahi waxaa kale oo uu sababay hoy yaraanta ka jirta magaalooyin badan oo Afrika ah.
- Wakhtigan Xaadirka ah dalal badan oo Afrikaan ah Itoobiya kamid tahay waxaa Abaaraha iyo gaajada ugu wacan dhacdooyinkan sida:-  
dhir-xaalufin, Daaqsin-Xad dhaaf ah, Qoodal-Xad-dhaaf ah, Wasakhaynta iyo arimo kale oo u sahla isbedelka Cimilada (lamadegaanoobid)

## 4.2 Xuquuqaha Caruurta Iyo Istiraatiijiyadaha Badbaadadooda

Tirada xiisadaha: 7

### 1. Ujeedooyinka gaarka ah ee ugu yaraan casharka

*Marka uu casharkani dhamaado kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-*

- *Tilmaamaan xuquuqda aasaasiga ah ee caruurta*
- *Tusaaleyaal ka bixiyaan qaababka kala duwan ee xuquuqda caruurta iyo ku xad-gudubyadooda*
- *Ku dhaqmaan xuquuqdooda dastuuriga ah.*
- *Isaga difaacaan naftooda xadgudubyada kala duwan ee loo geysanayo xuquuqdooda.*

### 2. Tusamooyinka ugu muhiimsan.

- 4.2.1 Bayaanka Qaramada Midoobay Ee xuquuqda caruurta
- 4.2.2 Xad-gudubyada xuquuqda caruurta iyo istiraatiijiyadaha looga gudbi karo
- 4.2.3 Hab-dhaqamada shilalka u nugul iyo ka badbaadidooda

### 3. Araar

Xuquuqda caruurtu waa mid lagu xusay Bayaanka Ururka Qaramaada. Midoobay iyo dastuurka Jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya.

Waxaana si faahfaahsan loogu xusay qodobadan soo socda:

- Caruurtu waxay xaq u leeyihiin nolol yeeshaanna magac iyo dhalasho.
- Inay waalidiintu ogaadaan daryeelaanna.
- Inay waxbarasho helaan
- In laga difaaco in lagu shaqaysto inta ay ka qaangaadhayaan
- Inay xor ka ahaadaan falalka ciqaab ahaaneed oo dhan.
- Inay xor ka ahaadaan falalka xad-gudubyada galmoodka iyo faraxumayn oo dhan.

Waxaa kale oo intaas u dheer istiraatiyadaha looga gudbi karo iyo ugu dambayn hab-dhaqamada shilka u nugul iyo ka badbaadidooda.

## 4. Hababka Baris-Barashada

### 4.1 Adeegsiga Kaabayaasha Barista.

- Bayaanka qoraalka ah ee Qaramada Midoobay
- Dastuurka Jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya.
- Calaamadaha digniinta shilalka

### 4.2 Adeegsiga Hababka Cashar-dhigista

- Su'aalo
- Dood
- Faahfaahin
- Falanqayn

### 4.3 Cashar diyaarinta ka hor

Baruhu inta aanuu casharka diyaarin ka hor waa inuu raadiyo Bayaanka qoraalka ah ee Qaramada Midoobay, Dastuurka Itoobiya iyo calaamadaha ama Astaanta shilalka looga hortago ee digniinta.

## 4.4 Soo Bandhiga Casharka

### B. Hordhaca Casharka

Casharka inta aadan ku bilaabin weydii ardaydu waxa ay ka yaqaanaan xuquuqda caruurta, xad-gudubyada loo geysanayo iyo talaabooyinka looga gudbi karo.

### T. Nuxurka Caharka

Dhageyso jawaabaha ardayda adiga oo sabuurada ku qoraya kuwa ay si sax ah uga jawaabeen

- U sharax bayaanka xuquuqda caruurta.
- U akhri xeerarka iyo shuruucda ku xusan Bayaanka Qaramada Midoobay iyo Dastuurka Itoobiya
- Tus calaamadaha digniinta ah ee shilalka
- Magacaw shilka ugu daran.

## 4.5 Qiimaynta iyo la socodka

### B. Qiimaynta

Hubi inay ardaydu fahmeen iyo in kale adiga oo weydiinaya su'aalo ku saabsan casharka. Ardayda ugu dadaalka badan ee sida ugu fiican u fahantay sii abaal marino, kuwa dadaalka yare ee liitana si ay u soo gaadhaan kuwa kale sii waxbarasho dheeraad ah.

### T. La socodka

Ku dabagal ardaydu inay ka soo shaqeeyeen hawlaha iyo layliyada aad u dirtay. Adiga oo dhibcaha ay keenaan ugu qoraya warqada dhibco ururinta.

## 4.3 Arrimaha iskaashiga

*Tirada xiisadaha: 4*

### 1. Ujeedooyinka gaarka ah ee ugu yaraan Casharka

*Marka uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-*

- *Aqoon u yeeshaan urur goboleedyada ka jira qaarada Afrika gaar ahaan Bariga Afrika*

- *Magacaabaan ururada hoos yimaada Bariga Afrika.*
- *Caddeeyaan ama muujiyaan wadaagista dhacdooyinka dhuleed ee urur goboleedyada Bariga Afrika.*
- *Sharaxaan baahida loo qabo iskaashiga*
- *Aqoon u yeeshaan ujeedooyinka laga leeyahay iskaashiga.*

## **2. Tusmooyinka ugu Muhiimsan**

- Ururka Horumarinta Dawladaha bariga Afrika (IGAD)
- Ururka u-ololeeya Biyaha Webiga Niil (NBI)
- Beesha Bariga Afrika (BBA)
- Fidsanaanta Juqraafiyadeed
- Hadafyada iskaashiga.

## **3. Araar**

Arimaha iskaashiga ee ka dhexeeya dalalka Bariga Afrika gaar ahaan urur goboleedyada kala duwan ee ka jira Bariga Afrika dhamaantood waxaa loo aasaasay ujeedooyinka ay ka mid yihiin:-

- Ilaalinta deegaanka
- Xal u raadinta qalalaasaha siyaasadeed iyo dhaqaale ee Bariga Afrika
- Midnimada, iskaashiga iyo isdhexgelinta dhaqaalaha ee dalalka Bariga Afrika
- Ilaalinta nabada iyo xasiloonaada gobolka isla markaana ay dalalka Bariga Afrika is waydaarsadaan waxtarka bulsho-dhaqan-dhaqaale.

## **4. Hababka Baris-Barashada**

### **4.1 Adeegsiga Kaabayaasha**

- Khariirada Aduunka
- Khariirada Afrika
- Khariiradaha urur goboleedyada Afrika.

## **4.2 Adeegsiga hababka Cashar dhigista**

- Faahfaahin
- Islafalanqayn
- Dood
- Koox-hawleedyo

## **4.3 Cashir-diyaarinta ka hor**

Baruhu waa inuu diyaarsado dhamaan kaabayaasha casharka looga baahan yahay, inta aanuu fasalka iman

## **4.4 Soo Bandhiga Casharka**

### **B. Hordhaca Casharka**

Ku bilow su'aalo badan si aad u kasbatid xiska iyo dareenka ardayda markaa kadib u bilow casharka cusub, Adiga oo u a deegsanaya kaabayaashii aad diyaarsatay.

### **T. Nuxurka Casharka**

Qaybaha uu casharku u sii kala baxo u faahfaahi, su'aalihii aad weydiisayna jawaabahooda ardayda kuwa ugu saxsan ku qor sabuurada.

## **4.5 Qiimaynta iyo la socodka**

### **B. Qiimaynta**

Hubi inay ardaydu fahamtay iyo in kale adiga oo u diraya Hawlgalo iyo layliyo si aad u kala ogaatid kuwa dadaalka badan iyo kuwa liita, islamarkaana dhibco uga qabanaya shaqooyinka ay ardaydu qabanayaan.

### **T. La socodka**

Ku dabagal ardayda hawlaha iyo layliyada aad u dirtay, adiga oo kuwa ugu dadaalka badan siinaya abaal marin hadii ay suuro gal tahay iyo wax ala wixii u dhigma ee aad u gelin ugu noqoto. Kuwa liitana si ay u soo gaadhaan kuwa kale waa inaad wakhtiyada ay firaqada yihiin siisid waxbarasho dheeraad ah.

## **Jawaabaha Layliga Guud Ee Cutubka 4**

### **I. Ku qor Run ama Been**

1. Run
2. Been
3. Run
4. Run
5. Run

### **II Isku Aadi**

1. B
2. T
3. J
4. D
5. X
6. Kh

### **III. Buuxi meelaha Bannaan**

1. Ururada samofalka ee Bulshada Rayadka ah
2. Xaalufinta Dhirta
3. Inta saxaaraha ka hoosaysa

### **IV. Ka Jawaab su'aalahaan**

1. Waxaa ka mid ah
  - B. Ka qayb qaadashada la dagaalanka HIV/AIDS
  - T. Daryeelka dadka uu cudurka HIV/AIDS ku uu hayo
2. Waxaa tusaale loo qaadan karaa
  - B. Hab-dhaqameedka loo yaqaano “Jamaca”
  - T. Iskaa wax u qabso
  - J. Naadi

3. Waxaa ka mid ah
  - B. Dhir-xaaluf
  - T. Wasakhow
  - J. Carro-guur
4. Markii ay tirade dadku si dhaqsa badan u korodho waxaa yaraanaya waxsoo saarkii waxaana markaa cidhiidhi gelaya cuntadii yarayd ee gacanta lagu hayay.
5. Waxaa ka mid ah
  - B. Ciqaabta
  - T. Shaqo aanay awoodi Karin
  - J. Waxbarasho la'aan
6. Waxtarka ay leeyihiin ururgoboleedyada iyo kuwa caalamiga ahi waa kuwo aan halkan lagu soo koobi Karin, waxaase ugu muhiimsan kuwan:
  - Adkaynta iyo xoojinta nabada
  - Iskaashiga dhinaca dhaqaalaha
  - Wada noolaanshaha iyo xidhiidh saaxiibtinimo oo waara. i.w.m

## Cutubka 1aad: Goobta, Dagaameynta iyo Dadka fasalka, 6aad Afrikada Bari; Waa => 19, xisadood

### Maxsuulka Cutubka: Ardaydu waxay awoodi doonaa:

- Inay aqoonsadaan goobaha ay dhacaan wadamada geeska Afrika.
- Inay fahmaan Ilbaxnimadii hore iyo hidaha bariga afrika.
- Inay aqoonsadaan saameynta cimilada iyo khayraadyada dabiiciga ah ee dagaamadooda iyo wada noolaansha Afrikada Bari.

Kartida	Tusmada	Waxqabadka Lafilayo
<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Ardayda waxay awoodi doonaan :</li> <li>▪ Inay bartaan bahda bariga Afrika meesha ay dhacdo.</li> <li>▪ Inay kala soocaan waqtiga iyo ilbaxnimadii nuubiyiinta iyo ilbaxnimadii Asku meyda</li> <li>▪ Inay aqoonsadaan walxaha ugu mihiimsan hidaha ilbaxnimadii hore ee Afrikada bari.</li> <li>▪ Inay sheegaan Dhibaatooyinka soo food saara goobaha taariikhiga ah .</li> <li>▪ Inay sharaxaan hababka loo isticmaalo goobahaas si looga ilaaliyo waxyeelo soo gaadha.</li> <li>▪ Inay aqoonsadaan goobaha bariga Afrika ee dadku ku badan yahay iyo goobaha dadku ku yar yahay.</li> <li>▪ Inay sharaxaan sababta iyo waxyaabaha saameeya dhaqdhaqaaqa dadka bariga Afrika iyo Itoobiya.</li> <li>▪ Inay kala soocaan qodobada dadku uu ugu</li> </ul>	<ol style="list-style-type: none"> <li>1. Goobta, dagaanka (degaameyn) iyo dadka Afrikada bari.             <ol style="list-style-type: none"> <li>1.1. Goobta Waa =&gt; 3. xiso.                     <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Goobta ay dhacaan wada madamada bahda Afrikada bari .</li> </ul> </li> <li>1.2. Dadka Afrikada bari Waa =&gt; 4, xiso .                     <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Ilbaxnimadii Nuubiya iyo Aksum.</li> <li>▪ Hidaha Aksum .</li> </ul> </li> <li>1.3. Ka ilaalinta iyo xafididda goobaha hidaha dhibaato soo food saarta. Habka lagu dhawrayo goobaha taariikhiga ah si ay u gaadhaan jiilasha dambe .</li> </ol> </li> <li>▪ Wax u sheegga dadweynaha booqda goobaha taariikhiga ah.</li> <li>1.4. Dagaameynta iyo wada noolaashaha bariga Afrika Waa =&gt; 6, xiso.                     <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Filiqsanaanta dadka.</li> <li>▪ Dhaqdhaqaaqa dadka.</li> <li>▪ Saameynta kororka</li> </ul> </li> </ol>	<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Wadyii ardayda inay sharaxaan waxa uu macnihiisu yahay xidhiidhka goobeed. Inay sharaxaan in magacyada goobaha ay laxidhiidhaan cufufka dhulka iyo biyaha oogoooyinka saaran.</li> <li>▪ Sawir khariidad madan oo ah bariga Afrika sabuuradda dusheeda, Ardaydana weydii inay guuriyaan iyagoon koox ah. Hadda weydii kooxha inay inay ku daraan wadamada Afrikada bari ee dariska la'ah badda cas iyo badweynta hindiya ugu danbeyn; weydii iyaga sida uu u dhammeystirayo fasalka khariidada sabbuuradda dusheeda ah . Kadib waxay ku guurin karaan khariidada oo dhammeystiran buuggagtooda. =&gt;</li> </ul>

<p>xoon san yihiin dhulka sare ee Ethiopia iyo Kenya iyo Tanzaniyaba .</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Inay aqoonsadaan saameeynta dadka bariga Afrika uu ku leeyayhay kororka dadka ee dhaqsaha badan .</li> <li>▪ Inay qoraan bulshada magaaleenta iyo dhaqamadooda.</li> <li>▪ Inay qodobada mas’uulka ka ah ay si guud uga hadlaan kala duwanaanshaha dagaameynta iyo noloshadaba.</li> <li>▪ Inay jeedalin ku sameeyaan sida siyaasaddu ay u saameeyso daganaan la’aanta iyo dagaalada sokeeye ee dad weynaha.</li> </ul>	<p>dadka.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Saameeynta ay magaalooyinku saameeyaan bulshada iyo dhaqanka.</li> </ul> <p>4.1. Qodobada kala duwanshaha dagaameynta iyo habnolol.eedka =&gt; 4, xiso .</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Cimilada iyo khayraadyada .</li> <li>▪ Daganaan la’aanta iyo dagaalada sokeeye.</li> </ul>	<p>Weydii ardayda winay caddeeyaan xidhiidhka goobeed ee ka dhexeeya nuubiya iyo Aksum. Marka higtana, waxaad hordhac ka siisaa dhaqanka nuubiyada. Kadibna, weydii ardayda inay sharaxaan iyagoon dood ku muujinaya farqiga iyo kala duwanaanshaha labadaa ilbaxnimo. Kadibna ardaydu ha qoreen warbixin.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Weydii ardayda inay u shaqeeyaan koox ahaan iyo inay helaan waxtarka hidaha inuu yahay il-dhaqaale oo laga helo dalxiiska.</li> <li>▪ Isticmaal tiro-goobyoo ku saabsan tirooyinka booqda goobaha qaranka ee caanka ah ee dalka, xogta ado karaadinaya wasaaradda warfaafinta iyo dalxiiska qaranka. =&gt; Adeegso goob cilmibaadhis oo caan ah kuna taala dalalkale, middaas oo sida badan booqasho lagu tago sida; Laamuu. Marka xiga, waxaad ardayda waydiisaa iyagoon koox ah inay u sheegaan fasalka Dhibaatooyinka soo foodsarta goobaha hidaha sida; xatooyada, wasakheynta , burburinta alaabta</li> </ul>
---	---	--

		<p>qiimaha leh ee hidaha, qalloocinta i.w.m.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Ardaydu waa inay dadweynaha warqad qoraal ah u dhajisaa sida loola dhaqmayo taalada Aksum.</li> <li>▪ Ardayda waa ina la'siiyo khariidad muujinaysa goobaha dadku ku badan yahay iyo meelaha ay ku yar yihiin ee teelteelka ah Afrikada bari=&gt; Ka doodsii arayda qodobada iyo waxyaabaha saameeyo isu-socodka dadweynaha dalka tusaale, socod bednida dadka oromada ah.</li> <li>▪ Arintan barbar dhig kororka dadka iyo isu socodka dalalka kale ee bariga afrika. =&gt; La'dood ardayda wax ay u arkaan qodobada furaha u ah ee dhaliya dhaqdhaqaaqa dadweynaha. Sida: - Cadaadiska dadka ka heysta yaraanshaha dhul-daaqeenka, socdaalka magaalooyinka ee laga imaanayo miyiga, lagana raadsanayo shaqooyin iyo nolol wanaagsan. =&gt; Waxaad isbarbar dhigtaa Addis-Ababa iyo Nayroobi, baadhis cilmiyeed cashir ah, sida labada dad ay kala tahay noloshooda xaga caasimad kasta, cidada u</li> </ul>
--	--	---

		<p>soo socdaashay magaalooyinka i.w.m.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Waxaad raacisaa jeedinta cashirka saameynta ay ku leeyihiin magaaleynta bulshada iyo dhaqankeeda.</li> <li>▪ Waxaad cashirka soo jeeidntiisa isbarbar dhigtaa farqiga u dhaxeeya dagaanka dhulka sare ee Ethiopia iyo dagaanka ku yaala dhul-hooseedka xoobta dalka Kenya, Giriyaamada eegta khayraadyada sida: Carada, biyaha hawlaha dhaqaalaha i.w.m.=&gt; Waxa aad sabuuradda dusheeda ku sawirtaa khariidada wadamada Bariga Afrika ku dherersan.</li> <li>▪ Weydii ardayda meelaha ay ka jiraan daganaan la'aanta ama dagaala sokeeye.=&gt; Isbarbardhig labo goobood oo dadkoodu socdaalo sameeyeen sababtoo ah , rabshada ka jira, sida; Ethiopia , Uganda, ama Somalia.</li> </ul>
--	--	---

### Qiimeynta:

1. Baruhu waa inuu qiimeyn joogto ah ku sameeyo shaqada ardayda inta uu socdo cutubkan waana inuu ibarbar dhigo sharaxa socda, isagoo ku saleynayo kartida, si uu go'aan uga gaadho inay gaadheen heerki waxbarasho ee looga baahnaa iyo in kale

## **2. Ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa:**

Waxay awoodi doonaan : Inay kala soocaan xidhiidhka. Goobeed ee Afrikada bari . Inay qoraan dalalka bariga Afrika . Inay kala soocaan aminta iyo muuqaalada waa weyn ilbaxnimadii Nuubiya iyo Ilbaxnimadii Aksumta.

- Inay aqoonsadaan goobaha taariikhiga ah ee muhiimka ah ee dalka. Inay sheegaan Dhibaatooyinka soo food saari kara goobaha taariikhiga ah . Inay qoraan hababkii loo dhawri lahaa goobaha taariikhiga ah.
- Inay aqoon sadaan goobaha dadku uu ku badan yahay iyo goobaha ay ku yar yihiin ee bariga Afrika.
- Inay sharaxaan sababaha iyo saameynta dhaqdhaqaaqa dadka dalka.
- Inay kala soocaan qodobada ay dadku ugu xoonsan yihiin dhulka sare ee Ethiopia.
- Inay si guud uga hadlaan qodobada mas’uulka ka ah kala duwaanshaha dagaameynta iyo habnololeedka.

## **3. Ardayda ka sarreysa Heerkii Looga Baahnaa;**

Ardayda heerka sare ka gaadhay dhanka shaqadooda waa in lagu qiimeeyo , loona aqoonsado himilada fiican ee ay ka gaadheen hawlihii waxbarashadooda. Waa in lasii dhiirigaliyo sii wadida shaqo adeyga iyo in ayna isdhiiganin si ayna uga hoos marin heerka fiican ee ay gaadheen.

## **4. Ardayda ka Hooseysa Heerkii laga rabay;**

Ardayda ka hoos marta shaqadii looga baahnaa waxay u baahan yihiin caawin dheeraad ah si ay u soo gaadhaan arday ka hadheen ee fasalkooda. Waana in la siiyo cashiro iyo sharax dheeri ah, waa in fiiro-dheer loo yeesho intay fasalka joogaan, waa in la siiyo xilliyada fasaxa ah, biriftida iyo galinada dambe aqoon dheeri ah, loona sheego waalidiinta dhashay si ay u ogaadaan heerka waxbarashada caruurtooda, si ay iyaguna gacanb u siiyaan.

## Cutubka 2aad: Dhulka; Waa gurigeena, Waa => 19, xisadood.

### Maxsuulka Cutubka: Ardaydu waxay awoodi doonaan:-

- Inay aqoonsadaan qaaradaha, dhulbiyoodka adduunka iyo inay isbarbardhigaan iyo inay sheegaan wixii farqi ah ee ka dhexeeya biyaha macaan iyo biyaha badda.
- Inay tilmaamaan sameynska lakabka hoose ee gibilka.
- Inay sameeyaan khariidad sawir-gacmeed ah iyo inay isticmaalaan midabo, calaamado iyo sumado muujinaya muuqaalada kala duwan ee dhulka.

Kartida	Tusmada	Waxqabadka Lafilayo
<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Ardaydu waxay awoodi doonaan :</li> <li>▪ Inay taxdo qaaradaha adduunka.</li> <li>▪ Inay magacaabaan dabadaha waa weyn ee adduunka.</li> <li>▪ Inay aqoonsadaan muuqaalo duleedka muhiimka ah ee bariga Afrika.</li> <li>▪ Inay sheegaan waxtarka dooxada weyn ee Rift valley.</li> <li>▪ Inay magacaabaan wabiyada harooyinka, iyo badaha bariga Afrika.</li> <li>▪ Inay isbarbardhigaan iyo inay sheegaan farqiga u dhexeeya astaamaha biyaha badda iyo biyaha macaan.</li> <li>▪ Inay fahmaan isticmaalka dhaqaale ee biyaha bariga Afrika.</li> </ul>	<p>2. Dhulka, waa hooygeena.</p> <p>2.1. Oogada dhulka Waa=&gt; 4, xisadood.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Qaaradaha.</li> <li>▪ Oogooyinka biyaha.</li> <li>▪ Noocyada biyaha (kuwa macaan iyo kuwa badda).</li> <li>▪ Oogooyinka biyaha iyo adeegsigooda arimo dhaqaale iyo bariga Afrika.</li> </ul> <p>Qaabdhuleedka ugu muhiimsan ee bariga Afrika Waa=&gt; 4, xisadood.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Muuqaalo duleedyada bariga Afrika.</li> <li>▪ Dooxada weynee Rift-ga</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Weydii ardayda inay magacaabaan todoba qaaradood iyagoon ka billaabaya kuwa waa weyn ilaa iyo kuwa yar yar sii wadayo, kana tilmaamaya khariidad bannaanee adduunka, kuna taala sabuuradda korkeeda , kadibna, ay ku qoraan buugagtooda: Asiya, Afrika, waqooyiga Ameerika, koonfurta Ameerika, Antartigga, Awstareeliya iyo Yurubta.</li> <li>▪ Baruhu haqiimeeyo ardayda si ay u sheegaan oogooyinka biyaha. Ardaydu ha' magacaabeen oogooyinka waa weyn ee biyaha sida; Badweynada, badaha yaryar, harooyinka wabiyada. Badaha waa weyn=&gt; waxaa ka mid</li> </ul>

<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Inay aqoonsadaan wax ka mid ah furayaasha muhiimka ah.</li> <li>▪ Inay fahmaan in biyuhu leeyihiin istiraatiijiyad muhiim ah.</li> <li>▪ Inay aqoonsadaan lakabyada gibilka.</li> <li>▪ Inay tilmaamaan sameyska lakabka hoose ee gibilka.</li> <li>▪ Inay sawiraan lakabka gibilka.</li> <li>▪ Inay fahmaan waxtarka midabeynta khariidada.</li> <li>▪ Inay aqoonsadaan calaamadaha waa weyn ee caalamiga ah iyo sumadaha loo isticmaalo khariidada.</li> <li>▪ Inay adeegsadaan calaamadaha caalamiga ah iyo sumadaha wakiilka ka ah xogta khariidada sawir gacmeedka.</li> <li>▪ Inay sameeyaan fure khariidadeed oo fudud.</li> </ul>	<p>2.3. Khayraadyada biyaha Afrika Waa =&gt; 2, xiso.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Harooyinka, wabiyada iyo badaha bariga Afrika.</li> <li>▪ Biyaha macaan iyo biyaha cusbada.</li> </ul> <p>2.4. Biyaha iyo adeegsiga dhaqaale ee bariga Afrika Waa=&gt; 2, xiso.</p> <p>2.5. Lakabyada gibilka.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Taraaboofeerka iyo sameyskiisa.</li> </ul> <p>2.6. Calaamada iyo sumadaha caalamiga ah Waa =&gt; 5, xiso.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Adeegsiga midabka.</li> <li>▪ Calaamadaha waa weyn iyo sumadaha.</li> </ul>	<p>ah: Indiyaan Ooshinta, Baafifig ooshinta i.w.m. Badaha yar yar waxaa ka mid ah =&gt; Fiktooriya, taana i.w.m. Wabiyada waxaa ka mid ah=&gt; Naayl, Amasoon, koongo, misisibi i.w.m. =&gt;Ardaydu ha'caddeeyeen noocyada biyaha iyo inay tusaale ka bixiyaan mid kasta; isda biyaha badda iyo biyaha macaan. Baruhu haqiimeeyo in ardaydu dood kus ameyaan muhimada dhaqaale ee ay leeyihiin oogada biyaha sida; daadgureynta, badmaaxnimada, waraabinta, kalluumaysiga iyo dhallin quwadda danabka.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Waa inaad caawisaa ardayda sidii ay u soo koobi lahaayeen qaaradaha, muuqaalada dhulka bariga Afrika, biyaha iyo adeegsiga oogada biyaha xagga dhaqaalaha bariga Afrika. Xaaladda baadhitaanka waa wabiga naayl.</li> <li>▪ Ardaydu hasameeyeen khariidada Adduunka hana sudheen gidaarka fasalka=&gt; Waxaa kale waxay ku guurin karaan</li> </ul>
--	---	---

		<p>maabka adduunka buugagtooda. =&gt; Ardayda fasalka ha calaamadiyaan muuqaalo-duleedka muhiimka ah ee ay yaqaanaan khariidada ku dulqoran sabuuradda. Kadibna, baruhu ha sharaxo, hana ku daro wax ayna aqoonin. Waxaad ku dartaa sharaxaaga; Dooxada Rifti, buuraha foolkaanada sida; Lengai, buurta kalimanjaaro, buurta Kenya, buurta Elgon, ras dashen, kobar sink sida: Dallol. =&gt; Ardayda waxaad weydiisa waxay ka yaqaanaan buuraha foolkaanada iyo xidhiidhkooda dooxada Riftida. Waxaad hadheysaa dhamaan riftigo ku yaala khariidada sabuuradda dusheeda ah, sharax ka bixi xilliga ay sameysantay daaxada Riftiga.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Weydii ardayda si ay kuugu caawiyaan kudaridda khariidada wabiyada iyo harooyinka kuyaala bariga Arika, ugu dambeyna badweynta hindiya iyo baddacas.</li> <li>▪ Waydii ardayda sida ay u yaqaanaan wax ku</li> </ul>
--	--	--

		<p>saabsan sida aad wax u qabaneyso, kadib, waa inay ku kordhiyaan xogtooda khariidada bariga Afrika.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Haku samayso ardaydu tijaabo ku saabsan biyaha macaan iyo kuwa cusbada ah. =&gt; Weydii ardayda inay dhadhamiyaan biyaha cusbada ah iyo haddii ay filayaan in loo isticmaali karo waraabka dhul-beereedka. Waxaa daraasad lagu sameyn karaa oo loo soo qadan karaa wax ku saabsan biyaha macaan kaluumeeysigooda ee harada fiktooriya. Waxaa kale oo daraasad looqaadan karaa badda dhimatay, taas oo marag u noqoto cusbada ay tahay marka lagu daboolanayo sidi; Rift valleyda tusaale: Harada Nakuru, waxay leedahay oo ku jira macdan kale.=&gt; Weydii ardayda inay qoraan isticmaalka ay filayaan in loo adeegsado iyo inay cinwaan ku sameeyaan sabuuradda sida: Daadgureynta, waraabinta, kallumaysiga, quwadda dabka oo laga dhaliyo i.w.m. Liis ka samee midkasta oo ah kuwan</li> </ul>
--	--	---

		<p>soo socda;</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Hadaba, waxaad fiiro u yeelataa midkasta oo kuwan soo socda ah cilmibaadhis kooban: sida; kalluumeysiga jabuuti, quwadda dabdhalinta Uganda, waraabka Ethiopia, taransboortiga, xamuulka maraakiibta mombasa i.w.m fasalka ku samee kadis si dib loogu eego aqoontooda ah muuqaalo duleedka lagu soo siiyay mar hore cutubka iyo isticmaaladooda.=&gt; Weydii ardayda inay sharaxaan waxay ka yaqaanaan wax ku saabsan gibilka ( atmosphere) iyo inay soo jeediyaan qeexidyo kuwaas oo lagu qoray sabuuradda, xulo mid wacan.</li> <li>▪ Hadda, waxaad sawirtaa jaantus dhulka ah oo muujinaya qallooca tusaya lakabyada; Taroobofeerka, istaraatoosfeerka, misosfeerka, termoosfeerka i.w.m. Waxaad sharaxdeaa inta uu mid waliba masaafo la'egyay. =&gt; Isticmaal tusaale ku saabsan diyaaradaha iyo joogga ay ku duuli karaan si loo sharaxo lakabyada, diyaaradaha caadiga ah,</li> </ul>
--	--	---

		<p>kuwa koonkoodhka iyo cirbixinta hawada sare.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Marka xiga, sharax in lakabka ugu hoose ee hawada ama gibilkaba inay ka sameysan yihiin neefaha naaytaroojiinta, ogsijiinta, kaarboon labo-ogsaaydhka iyo kuwo kale.=&gt;</li> </ul> <p>Daraasadda:- Waa hawadda joogeedu sareeyo oon laheyn neefta ogsijiinta. Duuliyaasha iyo buuro fuulayaasha waxay u baahan yihiin ogsijiin ay isticmaalaan marka kor loodhaaqa 10,000 feet waxaana caadaadis fuulaa qololka diyaaradda, sababtoo ah haddii aadan helin ogsijiin kugu filan waad isku dheyaac oo waad neef qabatoomi ilaa aad miyir daboolanto ugu dambeynta.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Istimaal khariidada cabirkeedu yahay 1:50,000 waxaadna dulsaartaa sabuuradda. =&gt; Weydii ardayda inay aqoonsadaan waxa midabkasta loo isticmaalo iyo inaad qorto liistada sida: Cagaarka /Doogga, Buluuga/Biyaha, Baroonka/Bededka sare, jaalaha/Jooga hoose, caddaanka/Dhakooyink a sare,</li> </ul>
--	--	--

		<p>casaanka/Waddooyinka waa weyn.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Waxaa sharaxdaa fikirka furaha ah, ardayduna habarato qeyb yar oo ka mid ah khariidada laxushay ee 1:50,000. Sababtoo ah, waxay koobaysaa noocyo sumado ah, waxay sameyni fure sahlan oo ay ku muujinayaan sumadaha ay arkaan.</li> <li>▪ Inta slagu jiro hawsha fasalka, sawir, magacawna calaamadaha iyo sumadaha tusaale: Goobaha warshadaha, dugsiyada, kaniisadaha, masaajidada, waddooyinka tareenka, waddaanka caadiga ah, dhirta, guryaha i.w.m.</li> <li>▪ Ardaydu waa inay sawirto khariidada sawir gacmeed ah ooy ku isticmaalaan goobahooda midabayo, sumado iyo inay u sameeyaan fure.</li> </ul>
--	--	---

### Qiimeynta:

1. Baruhu waa inuu qiimeyn joogto ah ku sameeyo shaqada ardayda inta uu socdo cutubkan waana inuu ibarbar dhigo sharaxa socda, isagoo ku saleynayo kartida, si uu go'aan uga gaadho inay gaadheen heerki waxbarasho ee looga baahnaa iyo in kale

## **2. Ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa:**

Waxay awoodi doonaan: Inay qoraan magcyada qaaradaha adduunka iyo muqaalada waa weyn ee dhulka bariga Afrika.=> Inay sheegaan oogada biyaha adduunka .=> Inay isbarbardhigaan iyo farqiga u dhaxeeya biyaha macaan iyo biyaha badda. => Inay aqoonsadaan isticmaalada dhaqaale eel oo adeegsado biyaha bariga Afrika.

- Inay tilmaamaan lakabyada gibilka.=> Inay tilmaamaan sameysyada lakabyada hoose ee gibilka.=> Inay aqoonsadaan calaamadaha waa weyn ee caalamiga ah iyo sumadaha loo isticmaalo khariidada .=> Inay isticmaalaan calaamadaha caalamiga ah iyo sumadaha wakiilada ka ah warbixinta khariidada sawir gacmeed.

## **3. Ardaydu shaqadeedu ka sarreyso heerkii looga baahnaa,**

Waa in lagu ammaano loona aqoonsado guusha ay gaadheen, waa in lagu dhiirigaliyo inay sii wadaandadaalka shaqo iyo inayna isdhiiganin.

## **4. Ardayda ay shaqadeedu ka hooseyso heerkii looga baahnaa,**

Waxay u baahan yihiin in la'siiyo caawin dheeri ah, si ay u gaadhaan fasalka ay ka hadheen, waana in la'siiyo fiiro dheeri ah inta ay fasalka ku jiraan iyo cashiro dheeraad ah waqtiyada birirfta ama galinada dambe ee maalintii.

## **5. Hannaanka qiimeynta,**

Waa in baruhu siiyo fiiro gaar ah iyo caawinta lagama-maarmaanta u ah ardayda qabta baahida gaarka ah (special needs)

## Cutubka 3aad: Deegaanka, Waa => 14, xiisadood.

### Maxsuulka cutubka: Ardaydu waxay awoodi doonaan:

- Inay aqoonsadaan noocyada dhirta iyo filiqsanaanteeda iyo qodobada saameeya dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah ee bariga Afrika. Inay fahmaan sababaha iyo waxyaabaha uu aadamaha ugeysto faragalinta deegaanka. Inay aqoonsadaan hababka lagu dhawro iyo waxtarka goobaha lagu xafido ee heerka qaran ah.
- Inay muujiyaan xiisaha ay u qabaan ka hortagga waxyeelada deegaanka.

Kartida	Tusmada	Waxqabadka Lafilayo
<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Ardaydu waxay awoodi doonaan:</li> <li>▪ Inay xidhiidhiyaan xayawaanada duurjooga ah ee jira filiqsanaanta dhirta dabiiciga ah.</li> <li>▪ Inay fahmaan in xayawaanadu ay sameystan la'qabsi ku habboon sabadooda.</li> <li>▪ Inay aqoonsadaan qodobadda muhiimka ah ee saameeya filiqsanaanta dhirta dabiiciga ah.</li> <li>▪ Inay fahmaan in dibad jooga noloshoodu ay saameyso haddii deegaanka lawaxyeleeyo iyo badashada joogida aadamigaba.</li> <li>▪ Inay fahmaan bilicda iyo qiimaha ay u leeyihiin dhirta iyo xayawaanada dabiiciga ah ee bariga Afrika.</li> <li>▪ Inay fahmaan dakhliga dal- xiisayaasha ka soo gala inuu ka qeyb qaadan karo ilaalinta naflayda duurjooga ah iyo</li> </ul>	<p>3. Deegaankeena.</p> <p>3.1. Dhirta dabiiciga ah iyo noolaha duurjooga bariga Afrika Waa=&gt; 2, xisadood.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Noocyada iyo filiqsanaanta dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah.</li> <li>▪ Xayawaanada iyo laqabsigooda sabada.</li> </ul> <p>3.1.2. Qodobada saameeya filiqsanaanta dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ee bariga Afrika Waa=&gt; 2, xiso.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Qodobada furaha u ah.</li> </ul> <p>3.3. Hababka loo dhawro biyaha iyo carada Waa=&gt; 4, xisadod.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Dhireynta, dib-udhireynta iyo dhir-beereynta.</li> <li>▪ Seexis sameyn.</li> <li>▪ Gudub u falidd.</li> <li>▪ Dalag bedel</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Weydii ardayda inay sharaxaan muuqaalada keynta, dhul cawseedka iyo lamo-dagaan xigeenka. Saddex cinwaan oo ku dulqoran sabuuradda waxaad ku dartaa kadib warbixin cusub oo iyaga ah.</li> <li>▪ Waxaad isbarbar dhigtaa cashir barashada ( case study) saddex tusaale oo ku saabsan saddex waddan oo bariga Afrika ah sida: lamadagaanka Ethiopia; dhul-cawseedka Kenya ( masia mara) iyo keynta buurahadalka Uganda.</li> <li>▪ Cinwaanadaa saddexda ah waxaad hoos keentaa dagaanka ama sabada, adigoo taxaya xayawaanada laga helo goob kasta. Sinjiyada (species) qaarkood waxaa suurogal ah in laga helo in kabadan halsabo.=&gt; Weydii ardayda waxay u maleynayaan waxa uu</li> </ul>

<p>sabooyinkoodaba.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Inay qiimeeyaan waxyeelooyinka kala duwan ee uu aadamigu u gesyto deegaanka dabiiciga ah.</li> <li>▪ Inay kala soocaan faragalinta uu aadamigu ku sameeyo dhirta dabiiciga ah.</li> <li>▪ Inay sharaxaan hababka loo dhawro carada.</li> <li>▪ Inay sharaxaansida loo dhawro biyaha.</li> <li>▪ Inay sharaxaan sida loo nadiifiyo biyaha .</li> <li>▪ Inay sharaxaan ujeedada iyo waxtarka dhul-seerayaasha qaranka.</li> <li>▪ Inay khariidad ku muujiyaan meesha ay dhacaan dhul-seerayaasha qaranka Ethiopia.</li> <li>▪ Inay aqoonsadaan dhul-seerayaasha waa-weyn ee bariga Afrika.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Yarenta adeegsiga kiimikada bacrinta iyo isticmaalka bacrinta orgaaniga ah.</li> <li>▪ Sifeynta biyaha.</li> <li>▪ Yarenta diqeeyaha ilaalinta nadaafadda balliyada iyo ilaha durdurada biyaha.</li> <li>▪ Biyo dhaansiga ama waraabinta.</li> </ul> <p>3.4. Dhul-seerayaasha qaranka iyo waxtarka ay u leeyihiin Ethiopia iyo bariga Afrika .Waa=&gt; 2, xiso.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Goobaha ay kuyaaliin, waxtarka iyo danta dhul-seerayaasha qaranka Ethiopia si loo dhawro, cilmibaadhisna loogu sameeyo iyo hiddo barashadaba.</li> <li>▪ Dhul-seeraha bariga Afrika waxay leeyihiin sheekooyin guul ah oo xayawaan iyo ilaalin dagaan ah.</li> </ul>	<p>yahay qodobada saameynta ku leh isbaahinta ama filiqsanaanta dhirta dabiiciga ah . Dood ka samee diirimaadka dunida iyo isbedelka cimilada iyo beero taabashada. Cashir barashada ku soo qaado saameynta ay ku leeyihiin abaaraha meelaha lagu hayo duurjoogta qaran iyo socdaalka ay sameeyaan duurjooga sida maroodiga, iyagoon ka tagaya meelaha dhirta laga xaalufiyay ee laga dhigto dhulbeereedyada.=&gt; Waa sidoo kale lawaayaa shabeelada iyo bahada sisadaha kale, marka dagaankooda uu dadku ku habsada si ay u dagaanama ay beero uga sameystaan , iyo markii ay u gaadhsada.=&gt; Cashar barashada ku soo qado gooriilayaasha ugaadha iyo ruwaanda: waxaa laga baabai'iyay dhirtoodii dagaanka u aheyd islamarkaana la'ugaadhsaday.=&gt; Baadhid cilmiyeed ku samee sinjiyada halista ku jira.=&gt; sheeg sanduuqa xanaanada duurjooga Aduunka. =&gt; Ka dooda qoraalna ka sameeya aad ku taxaysaan sababaha loo</p>
--	--	--

		<p>nadiifiyo dhrita si looga sameysto beero, adigoo raacinaya kororka dadweynaha, kadibna, hordhac ugu samee cashir barashada dhulka sare ee Ethiopia.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Ka dood sababaha dhaliya kororka dadka dabeecad ahaan ama sababta dalisa barakaca dadka ay keento cadaadis ku yimid oo ka haysta xagga hooyga iyo baahida shidaalka xaabada.</li> <li>▪ Ardayda iyada oo kooxo ah waa in kooxdiiba hal arin baadho sida; diraacda, caro-guurka, xaalufinta, daaqsinta xad-dhaafka ah, biyo yaraanta, diraacda iyo abaaraha, socdaalka i.w.m.</li> <li>▪ Koox kasta waa inay isku daydo inay helaan intii suuro gal ah wax ku saabsan ciwaanadooda iyo soo jeedinta warbixinta taas oo la'siinayo fasalka.</li> <li>▪ Isbarbardhig labo cashir barasho, midi waa xaalufinta daaqa iyo midka kale oo ah carro-guurka (Itoobiya iyo kiinya) .</li> <li>▪ Daad kasamee iyo sawiro aad ku muujinayso shaxano gudub u fal beerta ah. =&gt; Dood ka samee, sawira ku muuji</li> </ul>
--	--	--

		<p>shaxano tusaya habka waraabinta biyaha.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Dood ka samee iyo qoraal warqad muujinaysa sifeynta biyaha iyo ilaalinta ilaha biyaha iyo nadaafadda baaliyada.</li> <li>▪ Weydii ardayda inay taxaan beeraha xayawaanka lagu ilalaiyo ee dalka waxay ka maqleen iyo inay sabuuradda ku dulqoraan. Dhanka ku beeganna mid waliba waa inuu muujiyo waxa ay yihiin dhirta ama xayawaanka ah kuwa lagu ilaaliyo meesha, hana ka doodeen wax ku saabsan in ardaydu ay filayaan ama ayna fileynin inuu guulaysanayo baarkinka (dhulka loo seeray duurjooga iyo dhirtaba). Waxaana ka mid ah taxa liiska kuwansoosocda:       <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Dhul-seraha qaranka ee awash( Awash national park)</li> <li>▪ Dhul-seraha qaranka ee buuralayda seemiin.</li> <li>▪ Dhul-seraha qaranka ee Nejsaar ( nechsar)</li> <li>▪ Dhul-seraha qaranka ee buuraleyda baali</li> <li>▪ Dhul-seraha qaranka ee Maago</li> <li>▪ Dhul-seraha qaranka ee Oomo</li> <li>▪ Dhul-seraha qaranka ee Gambella.</li> </ul> </li> </ul>
--	--	---

		<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Dhul-seraha qaranka ee Yaangudi Rassa.=&gt; Ardaydu ha sawireen khariidad iyo inay ku daraan dhul-seerayaasha qaranka iyagoon adeegsanaya sumado iyo fure .=&gt; Inay sameeyaan cashir barasho ku saabsan inay guulaysanayaan dhul-seeraha Ethiopia .</li> <li>▪ Inay ka sameeyaan daraasada cashir barasho ah masaay mara (Kenya) =&gt; Inay ka doodaan muujinta khariidada bariga Afrika dhul-seerayaasha, iyagoon tixgalinaya cimilada iyo dhirta iyo ka doodidda noocyada duurjooga sida kuwa laga helo meeshaa. =&gt; Inay sameeyaan baadhi cashir barasho ah: Nayroobi; nolosha duurjooga ah iyo agoonta.</li> </ul>
--	--	---

### Qiimeynta:

1. Baruhu waa inuu qiimeyn jooqto ah ku sameeyo shaqada ardayda inta uu socdo cutubkan waana inuu ibarbar dhigo sharaxa socda, isagoo ku saleynayo kartida, si uu go'aan uga gaadho inay gaadheen heerki waxbarasho ee looga baahnaa iyo in kale

### 2. Ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa:

Waxay awoodi doonaan: Inay laxidhiidhiyaan xayawaanada duurjooga ah sida ay ugu baahsan yihiin ama ugu faliqsan yihiin dhirta dabiiciga ah dhexdeeda.

- Inay xushaan qodobada waa weyn ee saameynta ku leh baahidda dhirta dabiiciga ah iyo noolasha duurjooga ah.

- Inay fahmaan bilicda qiimo ee ay leedahay dhrita dabiiciga ah iyo xayawaanada bariga Afrika ku nool.
- Inay kala soocaan sababaha uu aadamigu u faragaliyo deegaanka dabiiciga ah. => Inay sheegaan hababka loo dhawro biyaha iyo carada. => Inay tilmaamaan macnaha dhul-seeraha qaranka (national park) .=> Inay ku muujiyaan khariidad dhul-seeraha qaranka Ethiopia .=> Inay aqoonsadaan dhul-seerayaasha qaranka ee bariga Afrika .
- Inay baadhaan waxtarka dhul-seerayaasha qaranka.
- Inay gar waaqsadaan muhimadda loo ilaaliyo dhul-seerayaasha qaranka, xagga tacadiga loo geysto.

### **3. Ardaydu shaqadeedu ka sarreyso heerkii looga baahnaa,**

Waa in lagu ammaano loona aqoonsado guusha ay gaadheen, waa in lagu dhiirgaliyo inay sii wadaandadaalka shaqo iyo inayna isdhiiganin.

### **4. Ardayda ay shaqadeedu ka hooseyso heerkii looga baahnaa,**

Waxay u baahan yihiin in la'siiyo caawin dheeri ah, si ay u gaadhaan fasalka ay ka hadheen, waana in la'siiyo fiiro dheeri ah inta ay fasalka ku jiraan iyo cashiro dheeraad ah waqtiyada birirfta ama galinada dambe ee maalintii.

## Cutubka 4aad: Arimaha Dadweynaha Waa => 17, xisadood

### Maxsuulka Cutubka Ardaydu waxay awoodi doonaan:

- Inay ka qeyb galaan ladagaalanka cudurka HIV/AIDS-ka.
- Inay bixiyaan tusaalooyin xuquuqda Caruurta ee lagu xadugdbo iyo farsamooyinka lagula cararo. Inay aqoonsadaan ururada gobalada hoos yimaada, xubnaha qaramada iyo inay sharaxaan danaha xidhiidhka iskaashi ee ururada bariga Afrika ka dhexeeya.
- Inay qorsheystaan xiisadahooda.

Kartida	Tusmooyinka	Waxqabadka Lasoo Jeediya
<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Ardaydu waxay awoodi doonaan :</li> <li>▪ Ogaanshaha waxtarka uu leeyahay midnimada bulshada ee la'dagalaanka cudurka HIV/AIDS-ka.</li> <li>▪ Inay horumariyaan habdhaqanada wax ku oolka ah eel oo la'noolaanayo waxna loo barayo dadka qaba HIV/AIDS-ka ee qoysaskoodu cudurku waxyeeleeyay.</li> <li>▪ Inay qaadaan mas'uuliyadda dhaleeceyn la'aanta ah iyo kala soocid la'aanta ah, daryeelna loo siiyo iyo taageero dadka iyo qoysaska uu hayo cudurka HIV/AIDS-ka.</li> <li>▪ Inay sharaxaan saameynta dhaqsaha badan ee uu leeyahay koororka dadka ee</li> </ul>	<p>4. Arrimaha dadweynaha.</p> <p>4.1. Waxyaalaha la xidhiidha arrimaha dadweynaha Waa=&gt; 3, xiisadood.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Ladagaalanka HIV/AIDS-ka oo loo siimarayo midnimada bulshada iyo qaadida mas'uuliyadda shacabka.</li> <li>▪ Ka fogaanshaha ceebeynta iyo kala sooca.</li> <li>▪ Daryeelsiinta iyo taageero.</li> </ul> <p>4.1.1. Kororka dhaqsaha badan ee dadweynaha Waa =&gt; 3, xisadood.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Ka baaraandagga dhir la'aanta, abaarta iyo diraacda, yaraanshaa dhulka la'beeri karo, kala jajabka.</li> <li>▪ Nabadgalyo la'aanta, cunto iyo hooy yarida</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Weydii ardayda waxay ka yaqaaniin cudurka HIV/ADIS-ka, ka dood siyaabaha ay bulshadu gacan daryeel iyo mid taakuleen u bixin karto.</li> <li>▪ Cashirka barasho baadhitaan ah waxaad ka dhigtaa iscaawinta bulshada ku nool magaaloyinka oo ay ka hawlgalaan NGoda. =&gt; Cashir barasho baadhitaan ah waxaad ka sameysaa qoysaska waxyeeloobay ee Ethiopia iyo Ugaanda.</li> <li>▪ Doororka uu ka ciyaarikaro lafalgalka ardayga ay wax wadbartaan kaas oo xanuunsan, sida uu shaqsi ahaan dareemayo bukaanka iyo sida ay ardaydu u dhaqmeysa.</li> <li>▪ Dood ka samee heerka ay gaadhsiisan tahay dhibaataada bulshada</li> </ul>

<p>deegaanka dabiiciga ah ee Bariga Afrika.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Inay sharaxaan waxa ay xuquuqda sasaasiga ah ee Caruurta.</li> <li>▪ Inay fahmaan sida loogu tunto xuquuqda Caruurta Ethiopia dhexdeeda.</li> <li>▪ Isticmaalka farsamooyinka lagu jebiyo xuquuqda Caruurta.</li> <li>▪ Iska caabinta duufsigada da'da.</li> <li>▪ Inay aqoonsadaan sida looga fogaanayo shilalka.</li> <li>▪ Inay bartaan sida looga dheerado shilalka.</li> <li>▪ Inay bartaan sida loola dhaqmo haddii ay wax dhacaan.</li> <li>▪ Inay magacaaban ururada hoos yimaada bariga Afrika iyo inay sharaxaan ujeedooyinkooda.</li> <li>▪ Inay muujiyaan wada xidhiidh ah dhacdooyin ka dhuleedk ee bariga Afrika ee urur-goboleedyada.</li> <li>▪ Inay sharaxaan baahida looqabo hadafyada iskaashi.</li> </ul>	<p>iyo diqawga.</p> <p>4.2. Xuquuqda Caruurta iyo badbaadadooda Waa =&gt; 3, xisadood.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Koobidda iyo dib u geegidda baayaanka UN- ee kusaabsan xuquuqda Caruurta.</li> <li>▪ Tusaalooyin ku saabsan tacadiga lagu sameeyo xuquuqda Caruurta sida: Afduubka Caruurta, tacadiga Caruurta, kaganacsiga suuqamadow, dhiigmiiradka shaqaalaha.</li> </ul> <p>4.2.1. Xeeladda ama siyaasadda lagu wado Waa =&gt; 2, xiso</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Maya dheh, bax, u sheeg waayeelka.</li> <li>▪ Adkeysiga duufsigada da'da.</li> </ul> <p>4.2.1. Dhicidda shilalka iyo tallaabooyinka badbaadada ah Waa=&gt; 2, xisadood.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Danabka korontada.</li> <li>▪ Suntan.</li> <li>▪ Dabka ( guriga ama keynta)</li> <li>▪ Walxaha qaraxa ama miinooyinka.</li> </ul> <p>4.3. Arrimaha iskaashi Waa =&gt; 4, xisadood. Urur-goboleedyada (IGAD, Nile basin INITIATIVE, ENSAP EAC).</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Xidhiidhka dhacdooyinka dhuleed.</li> </ul>	<p>dagaanka. Kadibna, ardaydu qorshaha ay ku caawin karaan hada jiyeen.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Dood ama naqtiin ka samee sababaha ugu wacan kororka dhaqsaha badan ee dadweynaha ama socdaalka.</li> <li>▪ Baadhid ka samee hooy xumada dhalisay inay dadka ka socdaalaan sababtoo ah abaarta caafimaad xaalad daraasadeedka guri xumada ka jirta naayroobi oo dhalisay cadaadis dadweyne. =&gt; Cashir barashada xeryaha qaxootiga ku nool sababtoo ah, daganaan la'aan ama daagaalo. =&gt; Diqawga wabiyada; cashir barashada ama xog wareysi lala yeesho goobaha ladagan yahay.</li> <li>▪ Cashir barahada loo soo qaato goobaha wax soos aarkii cuntadu ay hoos u dhacday, sababtoo ah, isbedelka cimilada iyo isbedelka kororka dadkii uu sameynaya.</li> <li>▪ Weydii arday haddii ay wax ka xasuusan yihiin xuquuqdada asaasiga ah ee ilmaha ee sanadkii hore wax ka qor.</li> <li>▪ Dood ka samee qeybo ka mid ah qodobada 1-12 ee ku saabsan badbaada caruurta. =&gt; Fasalku waa inuu dood ka sameeyo</li> </ul>
--	--	--

	<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Hadafyada iskaashiga</li> </ul>	<p>tusalaooyin ku saabsan macaamil xumada loogeysto.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Shaqo kooxeed: Ardaydu waa inay ka doodo, ayna qortaa noocyada macaamil xumada ay ku yaqaanaan inay ka dhacaan dagaankooda. Baruhu waa inuu fiiro dheeri ah siiyo marka ay ardaydu doonayaan inay ka hadlaan si kalsooni ay ku jirto. =&gt; Baadhisku samee, dhaqan xumada lagula kaco Caruurta Ethiopia iyo waddan kale oo bariga Afrika ah.</li> <li>▪ Kadooda siyaasdda ku wajihan arinkaas.</li> <li>▪ Ardaydu hakadoodeen Dhibaatooyinka ay yaqaanaan.</li> <li>▪ Dood ka samee waxa in laqabto ay tahay haddii waalidka ama walaalada ay kaa doodaan in la' dhawro siddaggan, xaataa haddii uu yahay waxa dhacay ee ay og yihiin inuu ahaa mid khalad ah.</li> <li>▪ Qor qeybo kala duwan oo shilal ah sabuudda dusheeda, weydiina ardayda inay tusaale ka bixiyaan waxyaalaha ay garanayaan ee dadka ku dhacay. =&gt; Weydii ardayda inay sharaxaan siyaabaha looga fogaan karo shilalkaas dhicitaan kooda.</li> </ul>
--	--	---

		<ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Weydi ardayda waxa ay qabanayaan haddii ay dhacaan shilal noocaas ah. =&gt; Hadaba, ardayda waa inaad u sheegto in qoraan warqad ka hadleysa bedbaadada shilalka kadibna, ay ku dhejiyaan gidaarka fasalka.</li> <li>▪ Kadood waxa uu yahay xarfaha la soo gaabiyay (a cronyn) islamarkaana weydii inay qoraan waxay ka yaqaanaan xuruuftaas. =&gt; Waxa ayna siimayaan magacyada ururada ay yaqaanana, kuna hoos qor liistadooda.</li> <li>▪ Weydii ardayda haddii ururadaasi ay xun yihiin ama ay tahay fiikir fiican. =&gt; Saambal u soo qaado qof dhab ah oo ka shaqeeya ururada degaanka iyo inay ku qoraan xusuus qoradooda.</li> <li>▪ Sidoo kale, xog wareysigu waa inuu ka mid noqdaa waa ururka yoolkiisu yahay.</li> <li>▪ Weydii ardayda haddii ay jecelyihin inay bartaan wax inay qabtaan ay tahay si ay u gudbaan imtixaankooda sharax hadafku ama ujeedada ay mar walba ay tahay kaalmo iyo in dadku kadib u qaadi karo. Weydii arday inay</li> </ul>
--	--	---

		<p>leeyihiin wax dano ama hadaf shaqsiyadeed.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>▪ Tusaale ku saabsan koox kubadda cagta ah kuwaas oo doonaya inay ururka ku biiraan. Miyay si wada jir ah u shaqeynayaan kooda, haddii ayna daneynin guuleysiga koxoda? Hadafkoodu waa inay guuleystaan.</li> <li>▪ Qof wlaba waxuu u baahan yahay inuu barto waxa uu/ama ay qabaneyso. Hadaba, wax u qabo waddanka.</li> </ul>
--	--	--

### Qiimeynta:

1. Baruhu waa inuu qiimeyn jooqto ah ku sameeyo shaqada ardayda inta uu socdo cutubkan waana inuu ibarbar dhigo sharaxa socda, isagoo ku saleynayo kartida, si uu go'aan uga gaadho inay gaadheen heerki waxbarasho ee looga baahnaa iyo in kale

### 2. Ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa:

- Ardaydu waxay awoodi doonaan :
- Inay fahmaan midnimada ay bulshadu kula dagaalameyso HIV/AIDS-ka. => Inay horumariyaan habdhaqanka lagu la noolaanayo, w axna lola baranayo dadka qaba HIV/AIDS-ka iyo qoysaskooda. => Inay ku dhaqaan xilkasnimada reer-magaalamimada iyo inay ka fogaadaan wixii ceeeyn ah, takoorid ah iyo inay siiyaan daryeel iyo taageero dadka qaba HIV/AIDS-ka iyo qoysaskooda.
- Inay sharaxaan saameynta dhaqsaha badan ee kororka dadka dabeecada ahaan iyo bulsho ahaan deegaanka bariga Afrika. => Inay si cad u sheegaan ku tumashada xuquuqda caruurta dalka Ethiopia. => Inay adeegsadaan dbaqaada farsamooyin lagula dhaqmo ku tumashada xuquuqda caruurta. =>

Inay gutaan talaabooyinka looga fogaanayo shilalka dhaca. => Inay sheegan urur-goboleedyada bariga Afrika. => Inay tusaan xidhiidhka jugoraafiyeed ee ee ka dhexeeya urur-goboleedyada bariga Afrika .

- Inay kala soocaan hadafyada iskaashiyeed ee urur-walba. => Inay ka doodaan baahida looqabo hadafyada iskaashiyeed.

### **3. Ardaydu shaqadeedu ka sarreyso heerkii looga baahnaa,**

Waa in lagu ammaano loona aqoonsado guusha ay gaadheen, waa in lagu dhiirigaliyo inay sii wadaandadaalka shaqo iyo inayna isdhanin.

### **4. Ardayda ay shaqadeedu ka hooseyso heerkii looga baahnaa,**

Waxay u baahan yihiin in la'siiyo caawin dheeri ah, si ay u gaadhaan fasalka ay ka hadheen, waana in la'siiyo fiiro dheeri ah inta ay fasalka ku jiraan iyo cashiro dheeraad ah waqtiyada birirfta ama galinada dambe ee maalintii.